**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada

# Siyaasadda Qaran ee Maareynta Deegaanka

February 2023

# Tusmada Siyaasadda


Cutubka 1aad Xaaladda Guud ........ 1
1.1. Hordhac ........ 1
1.2. Baahida Siyaasadda Maareynta Deegaanka ........ 3
1.2.1. Caqabadaha ugu Waa Weyn ee Deegaanka ........ 3
Cutubka 2aad Hadafka Guud, Ujeeddooyinka iyo Mabaadi'da Siyaasadda Deegaanka ........ 7
2.1. Hadafka Guud ........ 7
2.2. Ujeedooyinka Siyaasadda ........ 7
b. Ilaalinta Kheyraadka Dabiiciga ........ 7
t. Maamulka Deegaanka ........ 7
j. Iskaashiga Daneeyayaasha ........ 7
2.3. Mabaadi'da ........ 9
b. Xuquuqda Deegaan Nadiif ah ........ 9
t. Horumarka Waara (Joogteysan) ........ 9
j. Ka Qeyb Galinta Bulshada (Public Participation) ........ 9
x. Mabda' Taxaddarka (Precautionary Principle) ........ 9
Kh. Bi'iye ayaa Bixinaaya (Polluter-Pays Principle) ........ 10
d. Mas'uuliyadda Sharci ........ 10
r. Maamul Daadejin (Decentralization) ........ 10
s. Ka dhex muuqasho qeyb kasta (Mainstreaming) ........ 10
Sh. Ka hortag ........ 10
Cutubka 3aad ........ 11
3.1. Dib-u-eegista Siyaasadaha iyo Shuruucdii Hore ee Deegaanka ee Soomaaliya ........ 11
Cutubka 4aad ........ 13
Siyaasaddaha Waaxyaha (Sectoral Policies) ........ 13
4.1. Beeraha ........ 13
4.2. Xoolaha ........ 14
4.3. Keymaha ........ 15
4.4. Duurjoogta ........ 16
4.5. Kheyraadka Biyaha ........ 17
4.6. Kheyraadka Badda ........ 18
4.7. Kheyraadka Macdanta ........ 19
4.8. Kheyraadka Batroolka (Petroleum Sector) ........ 21
4.9. Tamarta ........ 22
4.10. Dhul daaqsiimeed ........ 23

Cutubka 5aad ........ 25
Siyaasadaha aan Waax ku koobnayn (Cross-sectoral Policies) ........ 25
5.1. Wasakhowga Hawada ........ 25
5.2. Wasakhowga Biyaha ........ 25
5.3. Dhawaqa/Jabaqda, Shucaaca, Elektromagnetik iyo Kiimikooyinka ........ 26
5.4. Maareynta Qashinka ........ 27
5.5. Nabaad-guurka (Xaalufka) Dhulka ........ 28
5.6. Kala-duwanaanshaha noole (Biodiversity) ........ 29
5.7. Cilmi-baaris ........ 30
5.8. Dhaqanka, Hidaha iyo Goobaha Taariikhiga ah ........ 31
5.9. Teknoolojiyada Cagaaran (Nadiifka) iyo Hal-abuurnimada ........ 31
5.10. Isbadelka Cimilada ........ 32
5.11. Maareynta Masiibooyinka iyo u diyaargarowga Xaaladaha Deg-dega ........ 33
5.12. Jinsiga iyo Deegaanka (Gender and Environment) ........ 34
Cutubka 6aad Hawlaha La xidhiidha Dhaqan gelinta Siyaasadda ........ 36
6.1. Heerarka Deegaanka ........ 36
6.2. Qiimaynta Saameynta Deegaanka ........ 36
6.3. Wacyigelin, Waxbarasho iyo Macluumaad ........ 37
6.4. Wada shaqeynta Daneeyayaasha Arrimaha Deegaanka ........ 38
6.5. Kobcinta Awoodda iyo Aqoonta ........ 39
6.6. Iskaashiga Caalamiga ah ........ 40
6.7. Dhaqangelinta Siyaasadda ........ 41
6.8. Dhaqaalaha ku baxaya Ilaalinta Deegaanka ........ 42
6.9. Dib-u-eegista Siyaasadda Dabagalka iyo Qiimeynta ........ 43
Cutubka 7aad ........ 45
Qaab-dhismeedka Hay’adaha Dowladda ........ 45
7.1. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada ........ 45
7.2. Wasaaradaha Waaxyaha ........ 46

# Cutubka 1aad

# Xaaladda Guud

## 1.1. Hordhac

Soomaaliya waxa ay ku taala Geeska Afrika waana dalka ugu kooneeya dhanka bari ee qaaradda Afrika. Waxay ku fadhidaa dhul bedkiisu dhanyahay 637,540 $km^2$ laga soo bilaabo koonfurta dhul badhaha ilaa Gacanka Cadmeed. Soomaaliya waxay leedahay xeebta ugu dheer qaarada Afrika (3,333 km), oo ay ku jiraan Gacanka Cadan ee waqooyiga ilaa Badweynta Hindiya ee bariga iyo koonfurta. Soomaaliya waxa ay xuduud la leedahay saddex wadan. Dhanka galbeed waxa ka xiga Itoobiya, dhinaca waqooyi galbeed Djibouti iyo dhanka koonfurgalbeed oo ay Kiiniya ka xigto. Sidoo kale, Soomaaliya waxaa dhanka waqooyi ka xiga Gacanka Cadmeed, dhanka bari na Badweynta Hindiya.

Cimilo ahaan Soomaaliya waa wadan kulul, qalalan, oomane ah oo saxare xiga. Laba xilli roobaad ayaa ugu muhiimsan kuwaasi oo kale ah: roobabka Guga (Abriil illaa Juun) iyo roobabka Deyrta (Oktoobar illaa Disembar). Roobabku way yar yihiin marka la eego wakhtiga ay da'aan iyo xadigooda oo waxaa dhici karta in laba xili roobaad oo isku xiga aanu wax roob ah di'in, taasina waxaa la filan karaa saddexdii sanoba mar. Gobolada dalka ee ugu qalalan (roobka yar) waa gobolada xeebta waqooyi iyo waqooyi-bari. Dhanka kale, gobolada ugu roobka badan waa waqooyiga-galbeed iyo koonfurta-galbeed ee dalka. Roobabka gobolada koonfur-galbeed waxa ay ka sarreeya celcelis roobaadka dalka.  Waddanku wuxuu leeyahay celcelis roob oo dhan 250 mm sanadkii.

Soomaaliya waxa ay muddo 30 (sodon) sano ah ku jirtay colaado iyo dagaalo sokeeye. Abaaro ba'an oo wadanka ku habsaday iyo colaado soo noqnoqnaaya ayaa si xun u saameeyay dalka waxayna sababeen dhimashada dadka, baaba'a hab nololeedka iyo xaalufinta deegaanka. Sanadkii 2014, guud ahaan dadka Soomaaliya ku nool waxaa lagu qiyaasay inay yihiin 12.3 milyan oo qof: kuwaas oo 42% ay ku noolyihiin magaalooyinka, 26% waa reer guuraa halka 23% ay ku nool yihiin miyiga, iyo 9% oo ah dadka dalka gudiisa ku barokacay (Soomaaliya - UNFPA, 2014) . Ku dhawaad, 69% dadka Soomaaliyeed noloshoodu waxa ay ka hooseeya heerka saboolnimada.

Sanado badan oo colaadeed kadib, Soomaaliya waxay qaaday talaabooyin ku aaddan  sidii loo heli lahaa nabad waarta. Wadanku wuxuu dejiyay Qorshaha Horumarinta Qaranka (National Development Plan 2017-2019 & 2020-2024) kaas oo ah  aasaaska siyaasadaha qorshayaasha

horumarineed ee mustaqbalka. Iyadoo taasi laga duulaayo, Siyaasadda Deegaanka ee Qaranka waxa ay ka jawaabaysaa ballanqaadka qaran ee ku aaddan in la helo deegaan nadiif ah sida ku xusan dastuurka ku meel gaarka ah qodobadiisa 25[aad], 45[aad] iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka.

Siyaasadda Deegaanka ee Qaranka waxa ay ka duulaysaa qodobadda kor ku xusan waxaana loogu tala galay sidii arrimaha deegaanku (environmental concerns) ay qayb uga noqon lahaayeen dhammaan howlaha horumarineed. Siyaasaddani waxa ay si kooban u sharraxaysaa caqabadaha deegaanka ee muhiimka ah ee hadda jira iyo kuwa mustaqbalka dalka soo wajahi kara, yoolka  iyo ujeeddooyinka siyaasadda deegaanka, mabaadii'da salka u ah tallaabooyinka siyaasaddeed, mowduucyada (halkudhagyo) istiraatiijiyadeed ee wax ka qabashada, tilmaamaha sharci dejinta iyo horumarka hay'adaha loo baahan yahay in ay gaadhaan (fuliyaa/dhamaystiraan) halkudhagyada istiraatiijiyadeed, iyo farsamooyinka loogu talagalay hirgelinta (fulinta) iyo dib u eegista siyaasadda. Siyaasaddani waxa ay martay geedi socod wadatashi oo ballaaran oo lala yeeshay Dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka Jamhuuriyadda Soomaaliya, Ururada Rayidka ah, khubaro, iyo daneeyayaal kale duwan.

Siyaasadda Deegaanka ee Qaranka waxaa loogu talagalay in ay noqoto hagaha tallaabooyinka la qaadayo dhanka deegaanka sida: horumarinta shuruucda, barnaamijyada iyo mashaariicda ilaalinta deegaanka; iyo dib-u-eegista iyo dhaqan-gelinta shuruucda ee hay’adaha  Federaalka iyo Dowlad Goballeedyada. Si looga faa’idaysto kheyraadka iyo awoodaha daneeyayaasha kale duwan ee deegaanka, korna loogu qaado maareynta deeganka, siyaasaddani waxay sidoo kale dhiirigalinaysaa sidii loo kobcin lahaa iskaashiga daneeyayaasha kala duwan ee deegaanka kuwaas oo ay ka mid yihiin: Wasaaradaha dowladda, dadweynaha, hay'adaha tacliinta iyo sayniska, maalgashiga gaarka ah, iyo hay'adaha horumarineed ee caalamiga ah. Tani waxay si gaar ah muhiim u tahay maaddaama la aqoonsan yahay in abuurida deegaan caafimaad qaba aanay ahayn mas'uuliyadda dowladda oo keliya, balse ay tahay  mid uu xil ka saaran yahaay muwaadin kaska . Sidaas darteed, maareynta arrimaha deegaanka dalku waxa uu u baahan yahay in ay dhamaan daneeyayaashu doorkooda ka ciyaarayaan. In kasta oo ay tahay in dowladdu ay dadaalkeeda kordhiso, haddana waa in qof waliba (qof iyo shirkad) aqoonsadaan mas'uuliyadda ka saaran daryeelka, ilaalinta, dayactirka iyo kor u qaadidda tayada deegaanka.

## 1.2. Baahida Siyaasadda Maareynta Deegaanka

### 1.2.1. Caqabadaha ugu Waa Weyn ee Deegaanka

Caqabadaha ugu waaweyn ee deegaanka Soomaaliyeed soo wajahay waxay la xiriiraan nabaad-guurka deegaanka (baaba'a deegaanka) iyo burburkii dowladnimada oo sababay in ay meesha ka baxaan hay'adihii dowladda ee u xil saarnaa ilaalinta deegaanka. Maaddaama uu waddanku sannado badan xasilooni daro ku sugnaa, waxa aad u yar aqoonta cilmiyeed iyo cilmi baaarisyo ku saabsan deegaanka Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, waxyeelada loo geystey deegaanka ayay cid kasta (walba) u jeeddaa (aan ahayn wax qarsoon). Burburkii Dowladda iyo qaab dhismeedka dowladnimo ee meesha ka baxay ayaa saameyn weyn ku yeeshay deegaanka Soomaaliya.

Kheyraadka dabiiciga ah ee dalka looma maareeyo si waara ama joogtaysan (sustainable management). Xaalufinta xawliga ah ee dalka oo dhan ka dhacday waxay abuurtay nabaad-guur iyo in uu wadankii saxaro isku badalo. Dhuxusha iyo xaabada ayaa wali ah isha ugu weyn ee tamarta laga isticmaalo magaalooyinka iyo miyigaba. Intaa waxaa dheer, dhoofinta dhuxusha sharci darrada ah ee laga dhoofiyo dalka ayaa weli ah mid halkeedii ka sii socota inkastoo go'aamo lagu mamnuucayo ay soo saareen Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay (UN Security Council Resolution 2036 (2012)) iyo dowladda Soomaaliya. Sida ay qortay hay'ada Qaramada Midoobay ee arrimaha deegaanka (UNEP), intii u dhaxeysay 2011 ilaa 2017, qiyaas ahaan 8.2 milyan oo geed ayaa laga gooyay (jaray) dalka Soomaaliya si loogu badalo dhuxul. Taasina waxay keentay in keymaha ku yaala Soomaaliya ay dabargo ku dhawyihiin islamarkaana ay noloshii dadka si xun u saamaysay. Xaalufinta dhirta ayaa horseeday nabaad-guur, cunto yari iyo u nuglaanta daadadka iyo abaaraha.

Iyadoo Dowladdu eegaysa arrimha kor ku xussan waxa la diyaariyay Siyaasadda Dhuxusha ee Qaranka si looga hortago xaalufinta dhirta. Burburka deegaanku waa caqabada ugu weyn ee sababta kor u kaca iyo sii socoshada saboolnimada , gaar ahaan reer-miyiga. Nabaad-guurku waxa uu saameeyaa bacriminta ciidda, xadiga iyo tayada biyaha, tayada hawada, kaymaha iyo duurjoogta.

Sidoo kale, daaqa iyo webiyada loogama faa'ideysan si waara (joogtaysan), taasina waxay sababtay hoos u dhac ku yimid fursadaha dhaqaale ee laga heli karo webiyada iyo daaqa. Haddii aan si joogtaysan looga faa'idaysan waxa kale oo yaraanaya ilaha daruuriga ah ee ay u baahan yihiin hay'adaha beeraha si loo maareeyo xilliyada dhibaatooyinka loona sameeyo keyd lagaga gudbo wakhtiga adag. Dadka saboolka ah aad ayay u jilicsanyihiin waxayna aad ugu nugul

yihiin dhibaatooyinka deegaanka ka dhasha. Hoos udhac ballaaran ee adkaysiga dadka waxa ay micnahiisu noqonaysaa in uu burburo qaab nololeedkii dadka, oo ay taasina khalkhal dhan walba ah keento. Burburinta kheyraadka deegaanku waxa uu sababi karaa in dadka qaarkood noqdaan kuwo sabool ah. Saboolnimada lafteeda ayaa sii xoojin karta nabaad-guurka deegaanka maaddaama isha dakhli ee soo gasha dadka saboolka ah ay tahay ka ganacsiga dhuxusha. Saboolnimada iyo burburka deegaanka ayaa sidoo kale waxaa sal u ah, oo lala xiriiriyaa korodhka tiradda dadka, taasna waxa sababa arimo badan oo adag isna biirsaday, oo ay ka mid yihiin kala duwanaanshaha iyo heerarka horumarka bulshada.

Intaa waxaa dheer, koriinka xawliga ah ee magaalooyinka iyo jiritaan la’aanta nidaam lagu maareeyo qashinka (adke iyo dureere) taasina waxay abuurtay dhibaato sii kordheysa oo dhanka qashinka ah. Burburka deegaanka magaalooyinka, la'aanta maareynta qashinka iyo fayadhowrka, warshadaha iyo dikhowga (wasakhawga) hawada, waxay si xun u saameeyaan hawada, biyaha, iyo carrada, waxayna si gaar ah saameyn ugu leeyihiin caafimaadka dadka Soomaaliyeed. Jirintaan la’aanta xeerka/sharciga maareynta qashinku waxa uu abuurayaa khatar sii kordheysa oo xagga caafimaadka iyo dhaqaalaha ah. Waxa muuqata lana ogyahay in tayada deegaanka oo liidata ay si ba’an u saamayn karto caafimaadka dadweynaha. Baryahan dambe waxaa soo batay cudurro aan barigii hore jirin ama aad ugu yaraa Soomaaliya. Waxaa la qiyaasayaa in dhibaatooyinka deegaanku ay qayb ka yihiin korodhka cudurrada aan horay looga aqoon Soomaaliya. Xidhiidh dhow ayaa ka dhexeeya deegaanka iyo arrimaha caafimaadka. Waxaa la ogaaday in wax ka qabashada dikhowga hawada, ilaalinta ilaha biyaha, ilaalinta carrada, kor u qaadidda fayodhawrka iyo nadaafadda, iyo caafimaadka guud ee dadweynuhu, ay hoos u dhigayaan dhibaatooyinka caafimaad ee bulshada soo wajihi kara. Waxaa kale oo aanu shaki ku jirn, si loogu guulaysto tallaabooyinka lagu ilaalinaayo deegaanka in lama huraan ay tahay in la sameeyo wacyigelin balaadhan iyo waxbarasho ku saabsan dhaqamada wanaagsan ee la xiriira dhaqanka bulshada guud ahaan iyo tan gaarka ah.

Dhanka kale, intii ay colaaduhu wadanka ka socdeen waxaa meesha ka baxay ilaaladii xeebaha Soomaaliya taasina waxay horseedday in qashin sun ah oo halis ah lagu qubo biyaha badda Soomaaliya. Falalkaas sharci darrada ah ee noocan ahi waxay khatar weyn ku yihiin caafimaadka dadka iyo deegaanka dalka. Intaa waxaa dheer, kheyraadka badda ee Soomaaliya waxaa faro baas ku haya (aad u daldasha) shirkado shisheeye oo si sharci darro ah uga kalluumeysta.

Sidoo kale, burburkii soo gaadhay hay’adaha dowladda iyo jiritaan la’aanta sharcigu wuxuu abuuray suuq aan la xakameyn (unregulated market). Ma jiraan halbeegyo deegaan

(environmental standards) oo loogu talagalay warshadaha kala duwan. Shidaalka la soo dejiyo, daawooyinka, mashiinada, qalabka isgaarsiinta, dhismaha iyo mashaariicda lama qiimeeyo oo tayadooda lama eego iyadoo la raacayo halbeegyo deegaan. Suuq (ganacsi) aan la xakameyn waxa uu leeyahay saameyn deegaan.

Ugu dambeyntiina, caqabado kale oo waaweyn ayaa ka soo ifbaxaya walaacyada laga qabo deegaanka ee ku soo kordhaya adduunka sida isbedelka cimilada. Isbedelka cimilada awgiis, khataraha la xiriira cimilada sida abaaraha oo kale way sii kordheen. Webiyaasha dalka ayay soo wajahdaa xaalado biyo la’aan oo aan horay loo arag taas oo keentay in qulqulka webigu uu yaraado ama qalalo taasina ay saameyn ku yeelato deegaanka xasaasiga ah ee ku tiirsan biyaha webiyada. Taasi waxa kale oo ay halis gelinaysaa noolayaasha webiga ku jira iyo kuwa hareerihiisa ku nool. Gudaha Soomaaliya, abaarta ayaa noqotay mid soo noqnoqota taasna waxay keentay in tobanaan kun oo dad ah oo ku nool Soomaaliya aanay helin cunto iyo biyo ku filan. Xalku waxa uu ku jiraa in fikrado cusub lala yimaado oo laga faa iidaysto kheyraadka dalka sida kalluunka iyo macdanta. Sidoo kale, Soomaaliya waa inay door firfircoon ka ciyaartaa nidaamyada laba geesoodka ah iyo kuwa caalamiga ah iyo barnaamijyada ku su saabsan arrimaha deegaanka.

Sidaasi darteed, marka la eego baaxadda caqabadaha deegaanka, waxaa la joogaa wakhtigii la soo saari lahaa Siyaasadda Deegaanka ee Qaranka taasoo asaas u noqon doonta sidii si waara (joogtaysan) loogu maareyn lahaa kheyraadka dabiiciga ee dalka. Dib-u-dhiska qaab-dhismeedka hay'adaha iyo shuruucda maareynta deegaanku waxay horseedi doonaan dadaallo xoog leh oo loogu talagalay dib u soo celinta awoodda hay’adaha, maareynta kheyraadka dabiiciga ee bulshada iyo dejinta qaab-dhismeed dowladnimo oo wax ku ool ah oo lala xisaabtami karo, siyaasad iyo qorshayaal la gaari karo. Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada waxa looga baahanyahay soo saarida siyaasadaha iyo nidaamyada ku habboon ee lagu maareynayo kheyraadka wadanka.

Marka la soo koobo, caqabadaha (dhibaatooyinka) ugu waaweyn ee soo wajahay deegaanka Soomaaliya waa:

1) Nabaad-guurka Dhulka (Carrada, Dhirta, xaalufinta iwm)
2) Yaraanta kheyraadka dabiiciga ah
3) Biyo yaraanta
4) Isbedelka cimilada (Musiibooyinka dabiiciga ah: abaarta, daadad/fatahaad)
5) Maqnaanshaha (Jiritaan la’aan) nidaamka (xeerka) maareynta qashinka

6) Qashinka khatarta ah (qubidda sharci darrada ah)
7) La'aanta maareynta khayraadka badda iyo xeebaha
8) Noocyo dhir oo aan la garanayn (garanwaa, kalidii noole iwm)
9) Wasakhowga hawada iyo biyaha
10) Jiritaan la’aanta shuruucdii lagu maamuli lahaa deegaanka
11) Saboolnimo (la'aanta dariiq kale oo nololeed oo dhuxusha looga gudbo)
12) Wacyigelin la’aan ku saabsan deegaanka
13) Khilaafka hubeysan (colaadaha) oo baabi’inaaya deegaanka dabiiciga

# Cutubka 2aad

# Hadafka Guud, Ujeeddooyinka iyo Mabaadi'da Siyaasadda Deegaanka

## 2.1.Hadafka Guud

Hadafka guud ee siyaasadda deegaanku waa in kor loo qaado caafimaadka iyo tayada nolosha dadka Soomaaliyeed iyadoo la raacayo tubta horumarka waara taas oo ah in kheyraadka dabiiciga ah ee dalka looga faa'idaysto habka maareynta wanaagsan (sound management).

## 2.2.Ujeedooyinka Siyaasadda

Ujeedooyinka gaarka ah ee siyaasaddan waxa ay ku qoranyihiin hoos. Ujeeddooyinkani waxay la xiriiraan fahamka hadda jira ee ku saabsan caqabadaha muhiimka ah ee deegaanka soo wajahay. Aqoonta deegaanku waa mid koraysa. Sidaas darteed, ujeedooyinka hoos ku xusan waa la badeli karaa wakhti ka dib:

### b. Ilaalinta Kheyraadka Dabiiciga

Waa in la ilaaliyo oo la xafido ilaha kheyraadka dabiiciga ah ee lagama maarmaanka u ah hab-nololeedka, kobaca dhaqaalaha, iyo guud ahaan wanaagga aadanaha. Kheyraadka dabiiciga ah ( ka is cusboonaysiin karo iyo kuwa aan is cusboonaysiin labadaba) waa in looga faa'idaystaa qaab waara/joogtaysan (sustainable manner) si loo haqab tiro baahiyaha jiilka hada jooga, iyadoo aan waxyeelo la gaadhsiinayn sidii jiilasha mustaqbalka ay iyaguna baahiyadooda uga haqab bixi lahaayeen.

### t. Maamulka Deegaanka

i. Waa in la xoojiyo maamulka deegaanka si loo hubiyo in kheyraadka dabiiciga ah ee dalka loogu maareyn lahaa si waara.
ii. Dowladda Federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah waa in lagu dhiirrigeliyaa oo awood loo siiyaa horumarinta, dib-u-dhiska iyo xoojinta hay'adaha lagama maarmaanka u ah ee gacan ka geysan kara maamulka deegaanka.
iii. Marka la horumarinayo kheyraadka dabiiciga ah, qorsheynta iyo fulinta mashaariicda waa in lagu dabaqo mabaadii'da maamul wanaaga iyadoo si buuxda loo tixgalinayo khasaaraha iyo faa'idooyinka (dhibka) dhaqaale, bulsho iyo deegaan ee ka dhalan kara horumarinta kheyraadka, qorsheynta iyo fulinta mashaariicda.

### j. Iskaashiga Daneeyayaasha

i. Waa in la dhiso oo la xoojiyo hay'adaha heer Federaal iyo dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah iyo in la kobciyo awoodaha lagama maarmaanka ah ee lagu maareynayo deegaanka Soomaaliya si waafaqsan Siyaasaddan iyo shuruucda deegaanka.

ii. Waa in dib loo soo nooleeyaa iskaashiga deegaan ee wadamada deriska ah iyo kuwa gobolka, ujeedaduna tahay in la taageero dhismaha nabadda, kor u qaadidda waxqabadyadda muhiimka ah ee ku saabsan deegaanka, iyo in la wadaago macluumaadka iyo aqoonta.
iii. Si kor loogu qaado wacyiga iyo fahamka ku saabsan deegaanka ee dadweynaha, waxa muhiim ah in dadweynaha loo ogolaado in ay ka qayb qaataan heerarka kala duwan ee howlaha maareynta deegaanka.
iv. Waa in deegaanka loo qoondeeyo kheyraadkii lagu maamuli lahaa kaas oo ka kooban maalgalin, teknolojiyad, xirfadaha maareynta deegaanka, aqoon dhaqameed, iyo raasamaal bulsheed. Si loo ilaaliyo deegaanka waa in uu iskaashi iyo macaamil dhexmara dhamaan daneeyayaasha arrimaha deegaanka: bulshada maxalliga ah, hey'adaha dowliga ah, bulshada tacliinta iyo cilmi baarista, maalgashadayaasha, iyo shirkadaha horumarineed, iyo iskaashiyada horumarineed ee laba geesood iyo caalami ah.

### 2.3. Mabaadi'da

Siyaasaddan waxa la soo saaray iyadoo la aqoonsanyahay horumarka waara/joogteysan (sustainable development), horumarkaas oo ah mid tixgalinaya caqabadaha (dhibaatooyinka) deegaanka mudnaana siinaya ilaalinta deegaanka. Ujeeddooyinka aan kor ku soo sheegnay waxaa la xaqiijin karaa (la gaadhi karaa) marka la sameeyo waxqabadyo istiraatiijiyadeed oo kala duwan kuwaas oo ay fulinayaa Dowladda Federaal iyo Dowlad Gobaleedyada.

Ka sokow sharciga, wax qabadyada istiraatiijiyadeed waxa ay ku salaysanyihiin mabaadi' cad iyadoo la eegayo habboonaanta, suurta galnimada dhanka kharashka, dhinaca farsamada iyo fulintooda. Mabaadi'da soo socota ayaa hagaya ficilada kala duwan ee fuliyayaasha (hirgeliyayaasha) siyaasaddan. Mid kasta oo ka mid ah Mabaadi'dani waxay aasaaskoodu ku abtirsadaan qawaaniinta siyaasaddaha, qaanuunka iyo sharciga caalamiga ah ee deegaanka.

#### b. Xuquuqda Deegaan Nadiif ah

Waxaa la aqoonsan yahay in xuquuqda dadka iyo deegaanku isku xidhan yihiin. Si xuquuqda aadanaha loo ilaaliyo waa in la helo deegaan amaan ah, nadiif ah oo caafimaad qaba. Dastuurka ku meel gaadhka ah ee Soomaaliya waxa uu dhigayaa in qof kasta xaq u leeyahay deegaanka nadiif ah (Qodobka 25[aad]).

#### t. Horumarka Waara (Joogteysan)

Bini'aadamka ayaa udub dhexaad u ah horumarka waara. Waxay xaq u leeyihiin nolol caafimaad qabta oo wax soo saarna leh, deegaanka dabiiciga ah si habboon uga faa'idaysata. Kheyraadka dabiiciga waa in looga faa'idaystaa qaab joogteysan (sustainable use of natural resources). Jiilka hada jooga waa inay baahiyahooda uga haqab baxaan iyagoon ku xadgudbeyn awoodda jiilalka dambe si ay iyaguna udaboolaan (uga haqab baxaan) baahidooda.

#### j. Ka Qeyb Galinta Bulshada (Public Participation)

Siyaasadda Maareynta deegaanku si ay u noqoto mid meel mar ah, waa in arrimaha deegaanka laga qeyb galiyaa bulshada qaybaheeda kala duwan. In kastoo dadka badankoodu aanay aqoon badan lahayn oo ku saabsan deegaanka, hadana waxaa muhiim ah in la helo taageeradooda si Siyaasaddu u dhaqan gasho. Dadweynaha waa in lagala tashadaa barnaamijyada, mashaariicda iyo hawlaha kale ee lagu ilaalinayo deegaanka.

#### x. Mabda' Taxaddarka (Precautionary Principle)

Haddii ay jiraan halis ama khatar la hubo in ay ku soo fool leedahay deegaanka waxyeelo culusna ay gaadhsiin karto kheyraadka deegaanka, la'aanta xaqiiq cilmiyeed (scientific evidence) oo buuxda sabab loogama dhigi karo in dib loo dhigo tallaabooyinka looga hortago waxyeelaynta deegaanka.

### Kh. Bi’iye ayaa Bixinaaya (Polluter-Pays Principle)

Kharashka nadiifinta deegaanka waxyeeladu ka soo gaadhay wasakheynta, magdhowga dhibbane, khasaaraha ka dhasha ficilkaas, iyo kharashyada kale ee ka dhasha dhibaato soo gaadhay deegaanka, waxaa bixinaya bi’iyaha (qofka dhibaatada sababay) (polluter). Bi’iyuhu waa qofka ficiladiisu horseedaan (sababaan) ama horseedi karaan waxyeelo soo gaadha deegaanka ama dadka.

### d. Mas'uuliyadda Sharci

Habka dib-u-hagaajinta deegaanku (ciqaabaha fal dambiyeedyada ee la xidhiidha deegaanka) waxay ku salaysnaanayaan maba’adiida madaniga ama ciqaabta. Mabaadi'dan waa in loo adeegsadaa si looga hortago falalka bey'adda halista ku ah, loona magdhabo dhibbaneyaasha waxyeeladdu gaadhay.

### r. Maamul Daadejin (Decentralization)

Maamul daadejinta waxaa ka mid ah baahinta awoodda Dowladda Federaalka iyadoo loo wareejiyo Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka, si loo xoojiyo mas'uuliyiinta dowladda ee heer gobol, degmo, tuulo maadaama iyagu si toos ah uga warhayaan arrimaha deegaankooda gaar u ah ama baahiyahooda sidii wax looga qaban lahaa. Qaab-dhismeedka Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa uu sheegayaa in loo baahan yahay in maamulka loo daadajiyo heerka ugu hooseeya ee suurogalka ah. Qaranka, dowladaha xubinta ka ah Federaalka, gobollada, degmooyinka iyo tuulooyinka waxa ay door muhiim ah ku yeelan doonaan ilaalinta deegaanka.

### s. Ka dhex muuqasho qeyb kasta (Mainstreaming)

Ka dhex muuqasho qeyb kasta waxaa loola jeedaa in si buuxda loo tixgaliyo arrimaha deegaanka marka la samaynaayo siyaasadaha waaxyaha (sectoral policies). Sidoo kale waa in la abuuro isku xidh ka dhexeeya cilmiga arrimaha bulshada, cilmiga dabiiciga iyo cilmi baarista la xiriirta deegaanka, lana xoojiyaa isku xirka iyo wada shaqaynta ka dhexeeya hay'adaha kala duwan ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad Gobolleedyada ku shaqada leh hirgelinta siyaasadaha deegaanka.

### Sh. Ka hortag

Waxaa la doorbidayaa in laga hortago waxyeelaynta deegaanku inta aanay dhicin. Taasi waxa ay ka wanaagsan tahay isku day kasta oo lagu soo celinayo deegaan burburay ama waxyeelo soo gaadhay.

# Cutubka 3aad

## 3.1. Dib-u-eegista Siyaasadaha iyo Shuruucdii Hore ee Deegaanka ee Soomaaliya

Siyaasadaha iyo Shuruucda Soomaaliya ee la xiriira deegaanka waa daciif wakhtigoodiina wuu dhacay. Xeerarka deegaanka Soomaaliya badankooda waxa la soo saaray wixii ka horeeyay 1991 kii sannadihii 1960-meeyadii, 70-meeyadii iyo 80-meeyadii. Tan iyo burburkii dowladdii dhexe, wax shuruuc deegan ah lama soo saarin. Intaa waxaa dheer, muddo dheer Soomaaliya may lahayn wasaarad u qaabilsan deegaanka oo markii u horreysay Wasaaradda Deegaanka iyo Maareynta Masiibooyinka waxa la aasaasay sanadkii 2005.

Maareynta deegaanka waxaa door muhiim ah ka ciyaari doona hay'ado kala duwan oo heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleedba ah. Ilaa iyo hada laba maamul ayaa soo saaray shuruuc iyo siyaasado lagu maareynayo arrimaha la xidhiidha deegaanka. Labadaasi dowlad gobolleed waa Somaliland iyo Puntland. Si kastaba ha noqotee, fulinta ama ku dhaqanka siyaasadahaas iyo shuruucdaasi weli waa daciif. Sidaa darteed, baahi weyn ayaa loo qabaa soo saaridda siyaasadda maareynta deegaanka ee heer qaran. Siyaasaddaas oo ah mid ka turjumaysay caqabadaha hada jira ee soo wajahaya deegaanka waxna ka qabanaysa dhibaatada lagu hayo deegaanka.

Tallaabooyinka gaarka ah ee soo socda ayay dowladdu qaadi doontaa:

1) Waa in dib-u-eegis lagu samayn siyaasadaha iyo shuruucda deegaanka ee haatan waddanka ka jira. Siyaasadaha iyo shuruucdii hore u jiray iyo kuwa cusub ee la soo saarayo waa in loo diyaariyaa si waafaqsan Siyaasadda Deegaanka ee Qaranka;
2) Waa in lagu dhiirigeliyaa lagalana shaqeeyaa Dowlad Goboleedyada sidii ay dib-u-eegis ugu samayn lahaayeen shuruucda iyo siyaasadaha deegaanka ee ay ansixiyeen ama ay soo saari doonaan si ay u waafaqaan Siyaasadda Deegaanka ee Qaranka;
3) Iyadoo la tixgalinayo ujeeddooyinka iyo mabaadi'da Siyaasadda Deegaanka ee Qaranka waa in is la xisaabtan jiraa heer Federaal iyo Dowlad Goboleedba, wakhti go'anna loo qabto sidii loo dhamaystiri lahaa shuruucda arrimaha deegaanka ee wadanka;
4) Waa in siyaasad kasta oo la soo saarayo uu saldhigeedu noqdo in ay kheyraadka dabiiciga ah looga faa'idaysto si waara (joogteysan);
5) Geedi socodka siyaasadaha iyo shuruucda waa in loo maraa nidaam wadatashi oo ay ka qayb galaan daneeyayaasha ay khuseyso;
6) Waa in la taageero oo awooddooda hay'adaha deegaanka la kobciyaa si loo xoojiyo ku dhaqanka shuruucda deegaanka iyo la socodka xaaladda deegaanka ee Soomaaliya.

Maaddaama ay korayso aqoonta xagga sayniska ee ku saabsan deegaanka, waa  in la cusbooneysiiyo (wax ka beddel lagu sameeyo) siyaasadaha si loola jaanqaado aqoonta cusub ee soo korodha.

# Cutubka 4aad

## Siyaasaddaha Waaxyaha (Sectoral Policies)

### 4.1. Beeraha

Beeruhu muhiim dhaqaale ayay ugu fadhiyaan Soomaaliya. Sida ay daabacday Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO), wax soo saarka beeraha Soomaaliya waxa ay daboolaan 50% baahida cuntada dadweynaha. Laakiin, beeraha Soomaaliya waxa ay ku tiirsan yihiin roobka oo wax soo saarka dalagga beeruhuna waxa uu ku xidhan yahay xaddiga roobka. Haddaba si loo yareeyo cunto yaraanta dalka ka jirta, wax soo saarka dalaggana kor loogu qaado waan in laga faa'idaystaa fursadaha wax soo saar ee laga samayn karo inta u dhexeeysa dooxada webiyada Shabeelle iyo Juba. Sidaa darteed, si kor loogu qaado hab-nololeedka beero-iyo-xoola-dhaqatada, beeralayda iyo wax soo saarka cuntada dalka siyaasaddu waa:

**Bayaanadda Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Xoojisaa (kobcisaa) awoodda hay'adaha dowladda Federaalka iyo Dowlad Gobolleedyada u qaabilsan beeraha sida Wasaaradaha Beeraha;
2) Hoos u dhigtaa gaajada iyo nafaqo-darrada, xoojisaana adkeysiga dadweynaha, oo ay la timaadaa tiknoolajiyad casri ah oo dalagga wakhti dheer kaydin karta si loo yareeyo halista abaaraha.
3) Dhiiri gelisaa dalagga u adkaysta abaarta (biyo yar ku baxa) sida yicibta, hohobta iwm;
4) Dayactirtaa kaabayaasha dhaqaale lana timaadaa tiknoolajiyado cusub oo la jaanqaadi kara cimilada si wax soo saarka dalagga kor loogu qaado oo loo dhaafo halkii la taagnaa burburka ka hor;
5) Hagaajisaa oo dayactirtaa kaabayaasha beeraha lana ballaadhiyaa kaabayaasha waraabinta (kannaallada iwm);
6) Kordhisaa wax soo saarka beeraha iyadoo la raacayo farsamooyinka iyo teknolojiyadaha casriga ee beeraha, qorshena u dajisaa waraabka beeraha;
7) Taageertaaa beeraha roobka ku tiirsan iyadoo laga duulayo saameynta isbedelka cimilada;
8) Ilaalisaa caafimaadka aadanaha iyo deegaanka iyadoo la soo saarayo sharciyo lagu maamulayo kiimikooyinka beeraha (dalagga iyo xoolaha);

9) Dhiirri gelisaa adeegsiyadda habboon ee dabiiciga ah iyo maareynta nafaqada ee qaab-dhismeedka carrada, heerka nafaqada iyo microbiology-ga ee lagu ilaalinayo nafaqada ciidda iyo xoolaha;
10) Yaraysaa habka daaqista aan xadka lahayn taasi oo sababta hoos u dhaca bacriminta daaqa;
11) U qoondayso (keydiso) dhul beereedka wax soo saarka wanaagsan (bacrin ah) ee waraabka loo adeegsan karo sidii looga beeri lahaa badarka (grain production) lagana daayo dalag lacageedka (cash crop) laga beero sida muuska;
12) La timaadaa qorshe lagu baadhayo ama lagaga hortagi karo cayayaanka beeraha (crop pests) sida ayaxa iyo waxyaabaha kale ee waxyeeleeya beeraha.

## 4.2. Xoolaha

Xooluhu waa laf-dhabarta dhaqaalaha Soomaaliya waxayna ka muhiimsan yihiin wax soo saarka beeraha. Dakhliga lacagta qalaad (Lacagta adag) ee waddanka soo gasha, 60% waxa laga helaa xoolaha. Sidoo kale, wax soo saarka guud ee dalka (GDP), xooluhu waa 60%. Xoolaha ku nool Soomaaliya waxaa lagu qiyaasaa 55,677,660 (shan iyo konton milyan lix boqol iyo todobaatan iyo todoba kun, lix boqol iyo lixdan) neef, kuwaas oo 13 ka mid ahi ay yihiin ido, 30.5 ari, 6.6 geel iyo 5.5 lo 'ah (FAO/FSNAU-MoLFR, 2019).

Dadka xoolo dhaqatada ah waxa lagu qiyaasaa 49%, dadkaas oo isugu jira xoolo dhaqato iyo xoolo dhaqato/beeraley ah (UNFPA, 2015). Dadka noloshoodu ku tiirsan tahay (noloshooda ku maareeya) xooluhu waa 65% (miyi iyo magaalo). Xooluhu waa hanti qaran oo muhiim ah laakiin waxaa soo wajahay halisyo badan oo sii kordhaya oo ay sababeen biyo yaraanta, jiritaan la’aanta iyo helitaanka daaq wanaagsan, duulaanka noocyada dhirta aan la garanayn, xaalufinta dhirta iyo dhulka, cudurrada xoolaha, iyo masiibooyinka dabiiciga ah sida abaarta iyo fatahaadaha.

**Bayaanadda Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Xoojisaa awoodda hay’adaha iyo kaabayaasha waaxda xoolaha (livestock sector);
2) Dhiirrigelisaa cilmi-baarista, horumarisaa xirfadaha, xoojisaana awoodda hay'adaha (dowli iyo kuwa gaarka ah) ee bixiya adeegga xoolaha;
3) Hagaajisaa adeegga caafimaadka xoolaha, sameysaana xarumaha daryeelka caafimaadka xoolaha si loo ilaaliyo tayada iyo badqabka xoolaha iyo uuntooda;

4) Hagaajisaa adeegyada caafimaadka xoolaha si loo ilaaliyo caafimaadka bulshada (gude iyo dibed);
5) Kobcisaa awoodaha lagula tacaalayo cudurrada xoolaha, wada shaqayn dhawna la yeelataa waddamada xoolaha loo dhoofiyo iyadoo la iska kaashanayo heerarka nadaafadda iyo shuruudaha kale ee dhoofinta;
6) Hagaajisaa adeegyada caafimaadka xoolaha si loo kordhiyo wax soo saarka milkiilayaasha yaryar iyo kuwa waa weyn;
7) Dhiirrigelisaa taranka cusub iyo farsamooyinka cusub (wanaagsan) ee xoolo dhaqashada;
8) Kor u qaadaa ganacsiga xoolaha iyo waxsoosaarka xoolaha (suuqyada gudaha, gobolka iyo caalamka);
9) Dardar galisaa maalgalinta gaarka ah ee wax soo saarka xoolaha;
10) Abuurtaa silsilad cuntada (calafka) xoolaha ah oo si fiican u shaqaysa iyada oo la xoojinayo siyaasadaha, sharciyada iyo istaraatiijiyadda dhirta /daaqa daaqa, lagana qaybgaliyaa bulshada;
11) Hagaajisaa badqabka cuntada (food safety) dalka iyo cuntada waaxda xoolaha.
12) Kobcisaa aqoonta ku aadan xoolo dhaqashada;

## 4.3. Keymaha

Sannadkii 1985 Soomaaliya waxay ahayd isha adduunka ugu weyn ee faleenka iyo xabkaha, waxayna soo saartay wax ka badan 2,000 tan. Kheyraadka dhirtu waxay dhaqaalaha dalka ku biirinaayeen 2.5 boqolkiiba (GDP). Dhaqaalaha ka sokow, dhirtu waxay dahaadh (dabool) muhiim ah u tahay ka hortagga nabaad-guurka, xasilinta carrada, iyo kobcinta biyaha dhulka hoostiisa (nuugista biyaha dhulka). Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay meelaha sida ba’an (xad dhaafka ah) loo daaqo. Daaqista ka sokow, dhulkaasi waxa kale oo cadaadis kaga imanayaa xoolaha dul socda (dul mara) taas oo si fudud u horseedda nabaad-guurinta carrada iyo in ay adkaato oo wax soo saarkeedu yaraado.

**Bayaanada Siyaasaddeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Si buuxda u hirgaliso Siyaasadda Qaran ee Dhuxusha;
2) Sameyso istiraatijiyad lagu horumarinayo keymaha isla markaana la dejiyo qaababka ugu wanaagsan ee looga faa’iidaysan karo keymaha;

3) Sare u qaadaa wax soo- saarka iyo suuq geynta Faleenka iyo Xabkaha, iyo dhirta kale ee caafimaadka muhiimka u ah iyo ka ganacsigooda
4) La tirakoobo dhirta Soomaaliya is la markaana la ogaado dhirta u gaarka ah dalka (indigenous plants). Taasi waxa ay suurta galin in dhirta Soomaaliya aan cid kale sheegan ama xadin (Biopiracy).
5) Sameyso nidaamka lagu maareynayo daaqa, dhirta iyo duurjoogta;
6) Xakameyso dhuxusha iyada oo la kobcinayo awoodda hay'adaha ay khusayso si loo xakameeyo dhuxusha sharci darrada ah lana dhaqan geliyo xeerarka khuseeya;
7) Iyadoo diirradda la saarayo magaalooyinka, Dowladu waa in ay dhiirrigelisaa sidii loo heli lahaa tamar looga gudbo (badel) dhuxusha sida adeegsiga shooladaha cuntada lagu karsado ee gaaska ku shaqeeya;
8) Dhiirrigelisaa sidii looga isticmaali laaha (miyi iyo magaalo ba) shooladaha qorraxda ku shaqeeya, soona bandhigto barnaamijyo lagu tababarayo dadweynaha;
9) Abaabushaa bulshada sidii ay uga qeyb qaadan lahaayeen mas'uuliyadda maareynta keymaha iyo dhirta;
10) Dowladda Federaalku iyadoo la kaa shaqanaysa Dowlad Goboleedyada, waa in ay abuurtaa kooxo ilaaliya dhulka sida gaarka ah buruburka (baaba'a) ba'an uu ka soo gaadhay shididda dhuxusha;
11) Dhiirrigelisaa maareynta geedaha (dib u soo celinta, beerista geedaha, maareynta) iyo sidii looga beeri lahaa agagaarka guryaha, dhulka daaqa, iyo hareeraha webiyada.
12) Hawl galisaa barnaamijyo dhir beeris iyo bacaad celin ah si looga hortago xaalufka iyo bacaadka.
13) Lagu amro qoys kasta in uu geed ku beero guriga hortiisa;
14) Mamnuucdo jaridda (goynta) dhirta marka laga reebo geedaha wadanka ku soo duulay (invasive plants).

## 4.4. Duurjoogta

Soomaaliya waxay hoy u ahayd dhir iyo xayawaanno kala duwan sida: Shimbiraha, Maroodiga, Libaaxyada, Geriga, Haramacadka, Shabeelka, Xamaaratada iyo xayawaannada kale ee duurjoogta ah. Laakiin, soddonkii sano ee la soo dhaafay, duurjoogta Soomaaliya hoos u dhac weyn ayaa ku yimid, hoos u dhacaas waxaa sababay baabi'inta hoyga xayawaanka, ugaarsiga sharci darrada ah, dagaalada hubeysan (colaadda) iyo xaalufinta dhirta dabiiciga ah ee dalka.

Taasi waxa ay keentay in duurjoogtii dalku (sida maroodiga) ay u guuraan (u haajiraan) waddamada deriska ah.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Sameyso daraasado ku saabsan xaaladda xayawaanka duurjoogta ee dalka iyo noocyadooda kala duwan;
2) Mamnuucdo qabashada, dilka iyo ugaarsiga dhammaan noocyada kale duwan ee duurjoogta Soomaaliya;
3) Mamnuucdo dhoofinta noocyada duurjoogta ee Soomaaliya oo kaliya laga helo;
4) Sharciga lala tiigsado muwaadiniinta ama shisheeyaha ku lug leh (ku kaca) ugaarsiga ama dhoofinta duurjoogta;
5) Sameyso seeroyaal duurjoogta loogu tallo galay (National Parks).

## 4.5. Kheyraadka Biyaha

Soomaaliya waa dal oomane ah oo saxare xiga (semi-desert). Roobabku ma badna, waa teelteel oo xilliyo kooban ayay da’aan. Sidaa darteed, waxa lagama maarmaan ah in kehyraadka biyaha waddanka si fiican loo maareeyo.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Fiiro gaar ah siisaa ilaha biyaha la cabo (biyaha dhulka hoostiisa, webiyada iwm) ee dalka lana hagaajiyo keydinta biyaha, dhaanka, isticmaalka biyaha ee magaalooyinka iyo qaybinta biyaha;
2) Kordhiso helitaanka biyaha ee meelaha baadiyaha ah iyadoo la dhisayo lana dayactirayo ceelasha iyo kaydka biyaha;
3) Qiimeyso is la markaana qorsheyso sidii looga faa’idaysan lahaa labada webi ee Shabeelle iyo Jubba iyadoo la is waafajinayo baahiyaha kala duwan ee biyaha (waraabka, isticmaalka/cabitaanka iyo xoolaha);
4) Wasakheynta ka dhawrto ilaha biyaha la cabo;
5) Ka hor inta aan mashruuc laga fulin agagaarka webiyada, waa in la sameeyaa qiimeynta saameynta deegaanka (environmental impact assessment) iyadoo si faahfaahsan loo sharaxo dhibka iyo faa’iidada mashruuca la rabo in la fuliyo;

6) Waa in laga faa'idaystaa biyaha dooxyada (laagaha) iyadoo la samaynayo biyo qabatino/biyo xidheenno (dams). Biyo badan ayaa gala badda iyagoon laga faa'idaysan.
7) Qiimayn lagu sameeyo kheyraadka biyaha ee ay Soomaaliya leedahay.
8) La sameeyaa nidaamka digniinta hore (early warning) ee fatahaada webiyada iyadoo iskaashi lala yeelanayo waddamada deriska ah;
9) In qashinka laga ilaaliyo webiyada is la markaana la dayactiro guntooda iyo hareera hooda (river banks). Waa in la hagaajiyo kaabadaha biyaha celiya.
10) In laga faa'idaysta teknolojiyadaha casriga ah ee ku aadan qabashada biyaha (water harvesting) si loo kordhiyo biyaha dalka iyo wax soo saarka dalaga.

## 4.6. Kheyraadka Badda

Aagga badda Soomaaliya waxa uu ka mid yahay kuwa ugu ballaadhan ee ku teedsan galbeedka Badweynta Hindiya oo waxaa xeebaha badda ku jira noole iyo ma nooleyaal muhiim ah (marine ecosystem). Soomaaliya waa dalka ugu xeebta dheer qaaradda Afrika (3333 km). Haddaba si loo ilaaliyo loogana faa'idaysto kheyraadka badda si waara (joogtaysan) siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Ilaaliso biyaha dhulka Soomaaliya iyada oo si deg deg ah loo qaadayo tallaabooyin ka dhan ah kalluumeysiga sharci darrada ah ee maraakiibta shisheeye, waa in la kobciyo awoodda lagu kormeerayo xeebaha is loo sugo amniga biyaha Soomaaliya;
2) Baadho qashinka sunta lagu shubo (ama shubay) badda islamarkaana lala yimaado qorshayaal wax lagaga qabanayo. Qashinkaasi waxa uu halis ku yahay caafimaadka bulshada, xayawaanka, noolaha badan iyo guud ahaan deegaanka.
3) Abuurto (la sameeyo) Hay'adda Maamulka Badda Soomaaliya si waafaqsan sharciga iyo dastuurka dalka;
4) In si waara (joogtaysan) looga faa'idaysto kheyraadka biyaha ku jira;
5) Siiso taageero wax ku ool ah shirkadaha ganacsiga gaarka ah si ay horumarin ballaadhin ugu sameeyaan kalluumeysiga;
6) Ilaaliso noocyada duurjoogta xeebaha (agagaarkooda) ku nool;
7) Samayso qorshayaasha maareynta kalluumeysiga heer kasta (Federaal iyo Dowlad Gobolleedyo) si loo horumariyo kalluumeysiga loogana faa'idaysto si waara (joogtaysan);

8) Dejisaa nidaam cad oo wax ku ool ah oo lagu maareynayo kalluumeysiga, ha ahaato heerarka federaal iyo dowlad goboleed;
9) Dib-u-eegis ku sameyso nidaamka qabashada (dabashada kalluunka), warshadeynta iyo dhoofinta kalluunka si loo maamulo (maareeyo) kalluumeysiga aan xad dhaafka ah korna loo qaado farsamaynta kalluunka si qiimo fiican loogu iibiyo;
10) Xakamayso xaalufinta kheyraadka badda lana ilaaliyo salka badda (sea bottom) in aanay waxyeeleyn taraafyada culus (heavy trawls);
11) Marka la eego saameynta isbeddelka cimilada iyo abaaraha soo noqnoqda ee dalka ka jira, Dowladdu waa in ay ahmiyad gaar ah siisaa kalluumeysiga iyadoo dhiirigelinaysa reer guuraaga xoollo dhaqatada ah inay xeebaha degaan iyo sidii loogu tababari lahaa siday kalluumaysato u noqon lahaayeen;
12) Maalgalisaa oo ay caawisaa kalluumeysatada yar-yar sidii ay u heli lahaayeen gawaadhida qaboojiyaha leh, doomaha iyo qalabka kalluumeysiga si kor loogu qaado dabashada (qabsashada) kalluunka loona yareeyo khasaaraha (kalluunka xumaada) ee uu sababo qaboojiye la’aantu;
13) Sameyso aagag (goobo) ka caagan kalluumaysiga oo lagu xanaaneeyo (ilaaliya) noocyada noolaha badda halista ku sugan (laga cabsi qabo in ay dabar go’aan) sida aargoosatada;
14) Muhiimad gaar ah siisaa ilaalinta Coral Reef (meelaha ay kalluunku ku nool yihiin), jasiiradaha badda iyo geedaha mangrove ka (geedaha ka baxa halka biya macaan iyo biyaha baddu iska galaan);
15) Iyadoo la tixgalinayo doorka ay ganacsatada gaarka ah iyo shirkadaha shisheeye (maalgalinta shisheeye) ku yeelan karaan kalluumaysiga, Dowladdu waa in ay dhisto xoojisana awoodaha hay’adaha Dowladda ee u xil saaran maareynta kalluumaysiga iyo illaalinta deegaanka;
16) Ka hortagto kalluumaysiga xad dhaafka ah ee aan wax tixgelin ah siineynin noocyada kalluunka la qabanayo ee ay ku kacaan kalluumaysatada yar yar;
17) La sameeyo nidaam lagu ilaalinayo nadaafadda iyo fayo-dhawrka kalluunka, lana bixiyo shahaado caddaynaysa tayada iyo nadaafadda kalluunka.

## 4.7. Kheyraadka Macdanta

Soomaaliya waxay leedahay kheyraad dabiici ah oo aan la taaban (aan la isticmaalin wali). In kasta oo dalku uu leeyahay keyd macdaneed oo ballaadhan (qiimo leh), haddana macdanta

Soomaaliya dhaqaalaha guud ee waddanka door weyn kuma leh. Sanadkii 1988 macdantu waxa ay wax soo saarka dhaqaalaha ee dalka ka joogtay 0.3 boqolkiiba wadarta guud ee GDP. Haddaba, si loo kobciyo dhaqaalaha loona horumariyo nolosha dadka Soomaaliyeed, sahminta iyo ka faa'iideysiga kheyraadka macdantu waa lama huraan (lagama maarmaan).

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Horumarisaa waaxda macdanta si wax weyn looga taro horumarka bulshada iyo korriinka dhaqaalaha;
2) Ka hor inta aan la fulin mashaariic la xidhiidha macdanta, waa in la sameeyo Qiimeynta Saameynta Deegaanka si faahfaahsanna loo darso lana sharraxo dhibaatooyinka deegaan iyo faa'iidooyinka mashaariicdaas;
3) Ka faa'idaysiga macdantu waa in ay fiiro gaar ah siisaa ilaalinta dhulka. Waa in la dhawro dhulka lana eegaa isticmaalka fog ee dhulka (long term usability) isaga oo aan la burburinayn si mustaqbalka loogu isticmaali karo beero ama hawlo kale;
4) Dhiirigelisaa, taakuleysaa, la tashataa oo tababbar siisaa macdan qodayaasha yar yar (small-scale miners). Waa in bulshada macdanta ku tiirsan la abaabulaa oo la baraa farsamooyinka habboon ee macdanta loo soo saaro iyo sidii ay u ilaalin lahaayeen shuruucda deegaanka una dhawri la haayeen badqabka dhulka iyo kheyraadka dabiiciga ah;
5) Iyadoo laga duulayo doorka ay ku yeelan karaan shirkadaha gaarka ah iyo maalgalinta shisheeye ka faa'idaysiga macdanta Soomaaliya, waa in la xoojiyaa (kobcisaa) awwoodaha hay'adaha ku shaqada leh waaxda macdanta si ay u maamulaan una maareeyaan hawlaha shirkadaha ku hawlan macdanta loona ilaaliyo deegaanka;
6) In si joogto ah loo hirgeliyo barnaamijyo waxbarasho oo loogu talagalay dadweynaha iyo shirkadaha macdanta baadha iyadoo la siinayo la talin farsamo iyo taageero ku aadan maareynta iyo ilaalinta deegaanka marka la baadhayo macdanta.
7) Xoojiso awoodda hay'adaha dowliga ah ee waaxda macdanta sidii ay u maamuli lahaayeen hawlaha macdanta is la markaana ay u bixin lahaayeen macluumaad, waxbarasho iyo farsamooyinka haboon ee ku saabsan macdanta iyo ilaalinta deegaanka.
8) Si loo yareeyo waxyeelaynta deegaanka, waa in heshiisyada macdan qodista (mining contracts) lagu daro fulinta saameynta qiimaynta deegaanka (EIA).
9) Si loola jaanqaado arrimaha soo ifbaxaya ee deegaanka, waa in si joogto ah dib u eegis loogu saameeyaa shuruucda macdanta ee dalka.

## 4.8. Kheyraadka Batroolka (Petroleum Sector)

Baadhitaanada la sameeyay (seismic surveys) waxa ay tilmaamayaan in Soomaaliya ay leedahay kheyraad ballaadhan oo dhanka batroolka ah. Badhitaanadaasi waxay qiyaasayaan in xeebaha Soomaaliya uu ku jiro shidaal gaadhaya 100 bilyan oo foosto. Si kheyraadkaas looga faa'idaysto, shirkadaha baadha batroolka ayaa aad u danaynaya maalgalinta shidaalka Soomaaliya. Dhanka kale, deegaan ahaan soo saarista shidaalku halisteeda ayuu leeyahay. Waxa loo baahan yahay in lala xisaabtamo shirkadaha ku hawlan shidaalka, is la markaana la hubiyaa ilaalinta deegaanka.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1. Sahaminta batroolka waa mid ku cusub dalka. Iyadoo laga faa'idaysanayo, isla markaana cashar laga baranayo caqabadaha soo waajahay waddamada Afrika ee shidaalka soo saaray, waa in la hubiyaa in mashaariicda batrool sahaminta iyo ka faa'idaysigoodu waafaqsan yihiin xeerarka ilaalinta deegaanka iyo Siyaasaddan.
2. Si wanaagsan u maareysaa kheyraadka batroolka ee dalka iyadoo la raacayo shuruucda iyo siyaasaddaha batroolka.
3. Diyaariso siyaasadda qaran ee batroolka (National Petroleum Policy) si ay u hagto waaxaha saliida iyo gaaska (batroolka), warshadeyntooda iyo warshadaha kiimikada batroolka;
4. Hubiso (ku dabaqdo) in siyaasadda batroolka, Sharciga Batroolka ee 2019 iyo shuruucda kale ee laxiriira batroolku waafaqsanyihiin Siyaasadda Deegaanka ee Qaranka;
5. Shirkadaha caalamiga (shisheeye) ee loo ogolaado sahminta ama qodista shidaalka waa in ay sameeyaan Qiimeynta Saameynta Deegaanka (Environmental Impact Assessment) ka hor inta aanay hawlahooda fulin. Mashruuc lama bilaabi karo ama ogolaansho lama siin karo ka hor inta aan la samayn Qiimeynta Saameynta Deegaanka.
6. La ilaaliyo deegaanka lana hubiyo in wixii waxyeelo ah ee soo gaadha dadka iyo deegaanka ay magdhaw ka helaan shirkadaha batroolka ee ku hawlan sahminta ama qodista shidaalka;

7. In la bilaabo dejinta iyo dib u eegista siyaasaddaha iyo istiraatiijiyadda lagu horumarinayo waaxda batroolka iyo wixii la hal maala (petroleum sub-sector).
8. In la hubiyo in hawlaha batroolku yihiin kuwo waafaqsan heerarka caalamka ee dhanka farsamooyinka wanaagsan, dhaqaale ahaan iyo deegaan ahaan.

## 4.9. Tamarta

Tamarta laga isticmaalo Soomaaliya waa mid ku tiirsan dhuxusha iyo xaabada. Baahida tamareed ee dalka 80% ilaa 90% waxa daboola dhuxusha iyo xaabada. Taasi waxa ay keentay in si xad-dhaaf ah (ba'an) dhirtii loo gooyo/jaro lana xaalufiyo dhulka. Isticmaalka sannadlaha ah ee dhuxusha ayaa lagu qiyaasay 4 milyan oo tan. Marka la eego xawliga isticmaalka dhuxusha iyo xaabada, dhirta Soomaaliya waxa ay halis ugu jirtaa dabargo' aan dib u soo noqosho laheyn.

Dhanka kale, awooda tamarta dib loo cusboonaysiin karo (renewable energy) ee dalku waa mid aad u badan. Soomaaliya waxa ay haysataa fursado aad u weyn oo looga faa'idaysan karo ilaha tamareed ee laga dhaliyo qorraxda, dabeysha, biogas, saliida / gaaska dabiiciga ah, biyaha webiyada iyo geothermal. Laakiin ilahaasi (sources) tamareed wali lagama faa'idaysan sababo la xidhiidha amniga iyo maaligelinta.

Soomaaliya mustaqbal fiican ayay leedahay oo xagga tamarta ah haddii laga faa'idaysto tamarta dabeysha, qorraxda iyo shidaalka. Waa in si buuxda loo baaraa, loogana faa'idaystaa si habboon.

Sidaa daraadeed, si loo kala duwo (diversify) ilaha tamarta ee Soomaaliya, siyaasadda Dowladdu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) La dhiiri galiyo maalgashiga ganacsiga gaarka ah si loo horumariyo tamarta shidaalka iyo ilaha tamarta dib loo cusboonaysiin karo (renewable energy);
2) Si loo daboolo baahida tamareed ee Soomaaliya, waa in si ku habboon deegaanka looga faa'idaystaa ilaha tamareed ee dalka;
3) Si loo ilaaliyo deegaanka loona hiigsado mustaqbalka, waa in la horumariyaa ilaha tamarta dib loo cusboonaysiin karo (renewable energy) si loo yareeyo isticmaalka tamarta shidaalka;

4) Dib u eegis lagu sameeyo bixiyeyaasha (shirkadaha tamarta) tamarta ee magaalooyinka lana hubiyo in howlahoodu waafaqsan yihiin heerarka deegaanka;
5) Iyadoo la eegayo muhiimada tamarta iyo saameynta ay ku yeelan karto deegaanka, waa in la dejiyo nidaamkii lagu maamuli lahaa waaxda tamarta;
6) Samayso heerarka adeegyada laydhka (nalka), sugnaanta (safety) tamarta lana maareeyo tayadooda;
7) Sameyso daraasado cilmi oo la xidhiidha deegaanka lana sameeyo khariidad (mapping) kahor soo saarista tamarta iyo sahminta;
8) Hubiso tayada shidaalka dalka la keeno si loo yareeyo halisaha caafimaad ee dadka iyo duunyada soo gaadhi kara;
9) Horumariso haamaha shidaalka (keydka tamarta) si loo helo tamar joogta ah sanadka oo dhan;
10) La helo tamar qiime jaban (hoose) si dad weynuhu uga maarmaan dhuxusha.

## 4.10. Dhul daaqsiimeed

Dhul daaqsiimeedku waa dhul ballaadhan oo ay ka baxaan dhir waddanka u gooni ah sida cawska (doogga dheer iyo kan gaaban), geedaha, savannas iyo geedo baahsan kuwaasi oo ay daaqaan xoolaha iyo duurjoogta. Dhulka kulul ama diiran ee uu ka baxo dhir iyo keymo loo adeegsado daaqa ahaan ama in alwaax laga sameeyo waxaa sidoo kale la odhan karaa dhul daaqsimeed.

Dhul daaqsiimeed waxaa lagu gartaa daaqa iyo jiritaanka dhir wadanka u gaar (native) ah, taas oo aan ahayn dhir dadku ay beereen. Waa la maareeyaa/xakameeyaa tirada xoolaha daaqi kara dhul daaqsiimeedka. Nidaamkaasi waxa la yidhaa Maareynta Dhul daaqsiimeedka. Maareynta dhul daaqsiimeedku waxa ay wax ka taraysaa in uu dhulku yeesho wax soo saar joogto ah lana ilaaliyo kheyraadka carrada, biyaha, dhirta, iyo nolosha xayawaanka. Ka sokow soo-saarka calafka xoolaha iyo duurjoogta, dhul daaqsiimeedka waxa kale oo laga heli karaa dhirta laga sameeyo alwaaxa, macdan, qurux dabiici ah oo loo tamashle tago.

Maareynta dhul daaqsiimeedka waxaa sal u ah maamulidda tirada xoolaha loo ogolyahay in ay daaqaan, muddada ay daaqayaan iyo xilliga ay daaqayaan. Daaqista waa in si taxadar leh loo maamulaa si aan cawska dhul daaqsiimeedka ku yaal mar kaliya loo wada dhamayn. Run ahaantii, dhibaatada ugu ba'an ee haysata dhul daaqsiimeedka waa daaqista xad dhaafka ah (over-grazing). Daaqista xad dhaafka ahi waxa ay yaraysaa (ama dabargoysaa) dhirta (doogga),

carradana waxay ka qaadaa dahaadhka sare (labeenta sare) taas oo sababta in carradu nabaad guurto oo ay gubato biyuhu aanay hoos u gali karin oo ay dul ordaan taas oo keenta dhulka oo dil dillaaca iyo daadad (flooding).

Daaqista xad dhaafka ahi waa dhibaato weyn oo ka jirta Soomaaliya. Intaa waxaa dheer, xaalufka ba'an iyo burburka deegaanku waxa ay halis ku yihiin dhul daaqsimeedyada taasina waxa ay khatar galinaysaa xoolaha iyo waaxyaha beeraha (dalagga). Waxa kale oo jira maareyn la’aan, roob yari iyo biyihii webiyada oo yaraaday.

Si loo maareeyo dhul daaqsiimeedka, sanadkii 1976 ayaa Soomaaliya waxaa laga aasaasay Hay'adda Maareynta Daaqa ee Qaranka (National Range Agency - NRA). Hay’addani waxa ay ahayd mid madax bannaan oo loo xil saaray dejinta iyo hirgelinta istiraatijiyadda horumarinta daaqa. Waxaa la sameeyay dadaalo lagu maareynayo dhul daaqsiimeedyada, kordhinta wax soo saarka xoolaha iyo xoojinta adkaysiga dadka Soomaaliyeed. Tan iyo markii ay burburtay dowladdii dhexe, maareynta dhul daaqsimeedyadu meesha wuu ka baxay. Sidaa darteed, siyaasadda Dowladda ee ku aadan dhul daaqsimeedka iyo daaqu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) La timaado qorshayaasha lagu maareynayo daaqa qaranka;
2) Sameyso seerayaal loogu talo galay in la isticmaalo wakhtiga abaaraha;
3) Ka shaqayso sidii kor loogu qaadi lahaa wax soo saarka calafka xoolaha si loo kordhiyo dheefta (wax soo saarka xoolaha laga helayo) xoolaha;
4) Dhiirrigeliso ururada/hay’adaha ku hawlan taageeridda iyo waxbarida xoolo dhaqatada sidii ay u soo saari lahaayeen calafka xoolaha;
5) La timaado sidii xoolo dhaqatada loo gaadhsiin lahaa waxbarasho dadban (non-formal education) xidhiidhna loola yeelan lahaa xoolo-dhaqatada;
6) Astaameyso oo ay kala saarto dhul daaqsimeedyada iyo xuduudahooda;
7) Abuurto jawi iskaashi si loo helo kalsoonida xoola-dhaqatada iyadoo xidhiidh joogta ah lala samaynayo tababaro na la siinayo;
8) Xoojiso Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta, iyo Daaqa iyo Wasaaradaha Dowlad Goboleedyada si ay u fuliyaan hawlaha horumarinta daaqa, waana in shaqaalaha heer kasta ee wasaaradahaas tababaro farsamo la siiyaa iyadoo diiradda la saarayo waaxaha (departments) maamulka, daaqa, deegaanka iyo keymaha.
9) Gacanta Dowladda lagu soo celiyo seerooyinkii hore (ka hore 1991) ee dalku lahaa.

# Cutubka 5aad

## Siyaasadaha aan Waax ku koobnayn (Cross-sectoral Policies)

## 5.1. Wasakhowga Hawada

Wasakhowga hawadu saameyn caafimaad ayuu ku yeelan karaa aadanaha iyo deegaanka. Ilaha ugu badan ee dikhowga hawada Soomaaliya waa:

1) Shidaalka baabuurta/gawaadhida (qiiqa ay gawaadhidu sii dayso)
2) Warshadaha korontada
3) Goobaha qashinka (gubida qashinka, qashinka wadooyinka iyo goobaha dadweynaha lagu daadiyo/shubo iwm)

Si loo yareeyo halista wasakhowga hawadu ay gaadhsiin karto dadka iyo deegaanka Soomaaliya, siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Dejiso heerarka qiiqa (shidaalka iyo ilaha kale ee wasakhowga sababa) hawada lagu sii dayn karo, xoojisana la socodka (monitoring) iyo hirgelinta heerarkaas;
2) Diyaariso oo ay la timaado qorshayaal wax lagaga qabanayo wasakhowga hawada magaalooyinka waaweyn;
3) Dejiso istiraatiijiyad/tub qaran oo ku aadan gaadiidka magaalooyinka si loo helo maalgalin (Dowlad iyo ganacsato gaar ah) lagu sameeyo gaadiidka dadweynaha (public transport) ee dikhow hooseeya;
4) La maareeyo qashinka iyadoo la raacayo siyaasadaha maareynta qashinka iyo shuruucdooda (siyaasadahaasi iyo shuruucdaas waan in la diyaariyo);
5) In la maamulo nooca baabuurta dalka la keeno maadaama baabuur duug ah la soo dejiyo.

## 5.2. Wasakhowga Biyaha

Maareyn la’aanta qashinka ayaa sabab u ah in ilaha biyaha (webiyada, biyaha dhulka hoostiisa, ceelasha, harooyinka, barkadaha, xeebaha iwm) si toos ah iyo si dadban u wasakhoobaan. Siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Kordhiso helitaanka biyo nadiif ah oo ay helaan dadka ku nool magaalooyinka iyo miyiga laguna dadaalo sidii meel kasta loo gaadhsiin lahaa dhuumaha biyaha (piped water) iyadoo la hiigsanayo yoolka qaranka (national goals) iyo yoolalka caalamiga ah (Yoolalka Horumarinta Waara/Joogteysan – Sustainable Develoment Goals);
2) Taageerto sidii loo xoojin lahaa awoodaha Dowladaha hoose sidii ay u soo ururin lahaayeen kharashaadka isticmaalka biyaha iyo bulaacadaha;
3) Diyaariso qorshayaasha maagaalooyinku ku maareynayaan wasakheynta biyaha, nadiifinta biyaha la cabo (treatment), dib u isticmaalida biyaha la isticmaalay, bullaacadaha iyo qashinka warshadaha, ka hor inta aan lagu sii dayn deegaanka;
4) Qaado tallaabooyin looga hortagayo wasakheynta ilaha biyaha gaar ahaan wasakhaynta ka dhalata qashin-qubka (waste disposal);
5) Kobciso awooda qorshaynta Dowladaha Hoose, iyadoo laga qayb galinayo bulshada waa in warshadaha la iskugu geeyaa goobo cayiman si ay u fududaato maareynta qashinka warshadaha (dib u warshadaynta qashinka warshadaha). Kharashka maareynta qashinka warshadaha waxaa bixinaya warshadaha;
6) Maamusho (regulate) waxyaabaha carrada lagu nafaqeeyo (bacriminta), sunta cayayaanka iyo kiimikooyinka kale ee loo isticmaalo beeraha iyadoo la tixgalinayo wasakheynta (dikhowga) ay walxahaasi gaadhsiin karaan ilaha biyaha;

## 5.3. Dhawaqa/Jabaqda, Shucaaca, Elektromagnetik iyo Kiimikooyinka

Jabaqda xad dhaafka ah iyo dhawaqa la dhibsado ee soo gaadha goobaha la deganyahay (residential areas), waxay dhaawici karaan caafimaadka bulshada iyo tayada nolosha dadka. Waxaa la aqoonsan yahay in buuqu (qayladu) ay tahay khatar caafimaad oo ka jirta magaalooyinka. Intii Dowlada dhexe bubursanayd iyo jiritaan la'aanta sharci haga ganacsiga ayaa waxa soo baxay suuq (ganacsi) aan nidaamsaneyn (unregulated market). Waxaa xaafadaha la degan yahay laga furay meherado, goobo ganacsi iyo warshado dhawaq badan samaynaya.

Waxa kale oo jira shucaac iyo elektromagnetik ka dhasha taawarada iyo qalabka isgaadhsiinta ee magaalooyinka gudahooda laga taago gaar ahaan goobaha la degan yahay (xaafadaha dhexdooda). Qalabkaasi waxa uu keeni karaa halis caafimaad. Sidoo kale, kiimikooyinka waan in laga fogeeyaa goobaha dadweynaha.

Si arrimahaasi wax looga qabto siyaasaddu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Si loo yareeyo dhibaatada dhawaqa iyo jabaqda, waa in la sameeyo deegaanno kala soocan iyadoo la raacayo heerarka dhawaqa (noise standards) sida deegaannada la deganyahay, goobaha ganacsiga, caafimaadka, waxbarashada, goobaha habeenkii lagu caweeyo, wadooyinka, garoonnada diyaaradaha iwm;
2) In la kala ogaado farqiga u dhexeeya dhawaqa goobaha shaqo (kuwaas oo ay tahay in shaqaaluhu dhagaha qalab gashado) iyo dhawaqa dadka caadiga ah soo gaadhi kara (dadka aan xidhiidhka la lahayn goobaha shaqo – third party);
3) Si joogto ah loola socdo tayada deegaanka iyo dhawaqa magaalooyinka lana hubiyo ku dhaqanka heerarka la ogolyahay;
4) La joojiyo taawaradda (lana raro kuwa horey looga taagay) laga taagayo xaafadaha dhexdooda kuwaas oo keeni kara halis caafimaad. Waa in la hubiyaa in qalabka isgaadhsiinta dalku waafaqsan yihiin heerarka caalaamiga ah ee shucaaca (radiation standards).
5) Deegaanka laga ilaaliyo kiimikooyinka dadka iyo duunyada waxyeelayn kara.
6) La ilaaliyo nadaafadda goobaha dadweynaha isla markaana laga mamnuuco in lagu shubo kiimikooyinka iyo walxaha kale sida saliidda baabuurta iyo wixii la mid ah.

## 5.4. Maareynta Qashinka

Bangiga adduunku waxa uu ku qiyaasay qashinka adkaha ah (solid waste) ee ay soo saaraan magaalooyinka ku yaal Soomaaliya in ka badan 1,500 tan maalintii. Qashinka adkaha iyo dareeraha (liquid waste) waxa ay ka mid ka yihiin dhibaatooyinka waa weyn ee ka jira magaalooyinka dalka. Qashinka aan la uruurin ayaa waxa uu ku baahsan xaafadaha iyo goobaha dadweynaha. Qashinka khatarta ah (hazardous waste) iyo kuwa aan halista ahayn ayaa lagu shubaa (qubaa) hal meel. Maareyn la’aanta qashinku waa halis caafimaad oo saamaynteeda leh. Si wax looga qabto dhibaatooyinka ka dhalan kara qashinka waa in si fiicn loo maareeyo.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Sameeyso daraasad ku saabsan xaalada qashinka adkaha ah ee ka jirta magaalooyinka lana soo jeediyo talooyinka ku habboon ee wax lagaga qabanayo dhibaatada qashinka;

2) Taageerto hay'adaha ku shaqada leh lagana caawiyo sidii ay qashinka halista ah u maareyn lahaayeen, sida la socodka (monitoring), xakameynta, farsameynta iyo nadiifinta;
3) La sameeyo baaritaan (daraasad) dhameystiran oo ku saabsan qashinka sunta ah ee lagu daadinayo dhulka, iyo badda dhexdeeda;
4) Dib u eegis lagu sameeyo goobaha warshadaha hada jira iyadoo la eegayo qashinkooda iyo farsamayntiisa iyo saameynta ay deegaanka ku leeyihiin;
5) Si aanay wasakhda qashinku ugu gudbin ilaha biyaha, waa in la abuuraa nidaam bullaacadeed oo si fiican u shaqeeya;
6) Hubiso in la helo nidaam lagu maareeyo qashinka adkaha iyo dareere ah ee guryaha iyadoo la gaynayo qashin-qubka (goobaha ku habboon ee loogu talo galay);
7) Waan in la aqoonsado khataraha caafimaad ee goobaha qashin-qubka ee u dhow guryaha (xaafadaha la deganyahay) loona raraa meel ku habboon (ka fog guryaha);
8) Waa in la mamnuuco isticmaalka bacaha fudud ee hal mar la isticmaalo (light weight single use plastics), lana dhiirigaliyo baddelkooda. Sidoo kale waa in la sameeyo warshadaha qashinka dib-u-warshadeeya (re-cycling);
9) Waa in kor loo qaado (la dhiirigaliyo) dib-u-isticmaalka iyo nidaamyada dib-u-warshadaynta si loo yareeyo cadadka qashinka ay magaalooyinku soo saaraan;
10) Waa in la sameeyo goobo qashin-qub.
11) Waa in dadka la wacyi geliyo si kor loogu qaado aqoontooda (ka warhaynta) dhibaatada qashinka loogana hortago qashin lagu tuurayo (shubayo) goobo aan ku aan habooneyn;
12) Baadhaa qashinka sunta ah (halista ah) ee lagu aasay ama qubay dhulka hoostiisa iyo dushiisa. Intii colaaduhu socdeen, dalka waxaa ku baahay qashin fara badan oo nooc kasta leh.

## 5.5. Nabaad-guurka (Xaalufka) Dhulka

Wax yaabo kale duwan ayaa sababa nabaad-guurka dhulka iyo ciidda (carrada), wasakhowga, iyo hoos u dhaca (yaraanta) walxaha dabiiciga ee nafaqeeya dhulka. Sababahaasi waxaa ka mid ah jaridda (goynta) dhirta, daaqis xad-dhaaf ah/aan la xakamyn (overgrazing), adeegsiga aan habboonayn ee kiimikooyinka iyo dhulka oo qashinka lagu qubo. Si loo soo celiyo bilicdii dhulka loogana ilaaliyo nabaad-guurka, siyaasaddu Dowladdu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Si loo xakameeyo nabaad-guurka carrada, waa in laga qayb galiyaa bulshada hawlaha nabaad-guurka lagu maareynayo lana sameeyaa seerayaal dhul daaqsiimeed si uu dhulku uga soo kabto (bogsado) dhaawaca soo gaadhay;
2) Waa in la xakameeyo shididda dhuxusha, iyada oo la raacayo Siyaasadda Dhuxusha ee Qaranka, lana sameeyo tubo (qorshayaasha) looga gudbayo dhuxusha iyo sidii loo heli lahaa ilo tamareed kale;
3) Si loo joojiyo (yareeyo xawaaraha xaalufinta dhirta) xaalufka dhirta, waa in la qaado tillaabooyin iyo barnaamijyo dhir beeris ah oo dalka oo dhan, lana sameeyo seerayaal;
4) Si loo yareeyo xawliga biyuhu ku socdaa (nabaad-guurka carrada), waa in la sameeyo biyo-xidheeno ama biyo qabatinno;
5) Waa in kor loo qaado bacriminta dhulka si loogu diyaariyo abuurka geedaha, dhir iyo doogga; lana sameeyo dhul daaqsimeedyo biyaha waddooyinka marana loo soo leexiyo;
6) Waa in ahmiyad gaar ah la siiyaa qorsheynta isticmaalka dhulka, lana sameeyo qorshayaasha lagu maareynayo daaqa laguna xakamaynayo nabaad-guurka carrada;
7) Waa in dib-u-habeyn iyo dib-u-soo nooleyn lagu sameeyaa deegaannada dhibaatadu soo gaadhay (aadka loo xaalufiyay);
8) Waa in la sameeyaa oo la hirgeliyaa heerar qaran, mabaadiida iyo shuruucda maareynta keymaha.

## 5.6. Kala-duwanaanshaha noole (Biodiversity)

Soomaaliya waxa ay ahayd xarunta xayawaan iyo dhir fara badan oo kala jaad ah kuwaas oo noloshoodu ku tiirsanayd cimilada dalka. Waxaa dalka ku noolaa duurjoog fara badan oo kale duwan oo Soomaaliya waxa loo aqoonsanaa in ay ahayd meelaha ugu wanaagsan Afrika in ay duurjoogtu ku noolaato. Wakhti xaadirkan, xaaladdu sidaas wey ka duwan tahay. Xaalufin ba’an ayaa waxa ay halis galisay nolosha duurjoogta oo haatan dabargo’ ku dhaw waxaana burbur weyn soo gaadhay deegaan-nololeedka dabiiciga ah (ecosystem). Xaaladda xayawaanka duurjoogta ah ee Soomaaliya waxaa la sheegaa inay tahay kuwo aan badnayn oo kala firidhsan taasina waxaa sababay burburka hoygii duurjoogta, daaqista aan la xakamayn ee xoolaha, iyo ugaadhsiga sharci darada ah. Haatan goobo kooban ayaa duurjoogta laga helaa (ay ku hadheen), noocyo badanna waxa ay u dhowyihiin dabargo’. Si loo ilaaliyo noolaha dalka (dhir iyo xayawaan), siyaasaddu Dowladdu waa:

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Waa in la dhawraa noolaha kala jaadka ah iyadoo la ilaalinayo hoyga noolaha ee badda gudihiisa, shimbiraha badda, diinka badda, cawska badda gunteeda ka baxa iyo goobaha cufka shimbiraha badda;
2) Waa in la aqoonsato khataraha ay leeyihiin noocyada dhirta aan horey loo aqoonin (invasive species) lala yimaadaa istiraatiijiyad lagu xakameynayo oo la maareeyo dhirtaasi;
3) Waa in laga qayb galiyaa lagana taageeraa bulshida sidii ay u qaadi lahaayeen tallaabooyinka lagaga hortago, ciribtirayo ama lagu xakamaynayo dhirta garanwaaga ah ee deegaanka waxyeelaysa dhulkii beerahana la wareegtay;
4) Waa in la abuuro seerayaal iyo barnaamijyo dhir beeris ah, lana soo celiyo hoygii duurjoogta si ay u soo noqdaan duurjoogtii waddanka ka tagtay;
5) Marka la samaynayo qorshayaasha maareynta deegaanka iyo isticmaalka dhulka, waa in la tixgeliyaa baahida loo qabo in la dhowro noolaha kala jaadka ah oo la abuuro marinno ama goobo iyaga u gaar ah;
6) Waa in la ilaaliyaa hoyga duurjoogta lana mamnuucaa ugaadhsiga sharci darrada ah;

## 5.7. Cilmi-baaris

Si kor loogu qaado aqoonta (fahamka) sayniska ee arrimaha deegaanka, waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo cilmi-baadhis. Cilmi-baadhistaa waxa samaynaya hay'adaha karti u leh sida jaamacadaha iyo macadyada cilmi-baarista. Wada-shaqeyn joogto ah oo ay yeeshaan saynis yahanada (aqoonyahanka), Dowladda, jaamacadaha, iyo hay'adaha gaarka ah, waxay wax weyn ka taraysaa in si qoto dheer loo fahmo arrimaha deegaanka, la dejiyo siyaasaddo iyo shuruuc ku habboon, door muhiim ah na laga ciyaaro wada xaajoodyada iyo heshiisyada caalamiga ah.

Siyaasaddani waxa ay dhigaysaa in si mudaysan (periodically) daraasado loo sameeyo mudnaantana la siiyo mawduucyada muhiimka ah.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Sameyso cilmi baaris dalka oo dhan ah (nation-wide) oo ku saabsan guud ahaan xaaladda deegaanka Soomaaliya gaar ahaana xaalufinta dhirta iyo darbagoa xayawanaadka. Cilmi baadhistu waxa ay qayb ka qaadan in la ogaado xaaladda deegaanka iyo tallaabooyinku ku haboon ee lagu wajihi karo (wax lagaga qaban karo).

2) Sameyso barnaamijyo cilmi-baaris ah kuwaas lagu dersayo (ogaanayo) mawduucyadda ay Dowladdu mudnaanta siinayso. Daraasadahaas waa in ay ka soo baxaan natiijooyinka la taaban karo oo si cad u qeexan;
3) Dhiirrigaliso cilmi-baarista madaxa banaan ee ka baxsan mawduucyada Dowladda loona fidiyaa dhaqaale iyo taagero kaleba;
4) Waa in la aasaasaa xarumo cilmi baaris iyo tikniyoolajiyad casri ah oo lagu derso xaalada deegaanka, saameynta howlaha bani'aadamka iyo sidii wax looga qaban lahaa;
5) Iyadoo lala kaashanayo hay'adaha caalamiga ah ee u qaabilsan iyo xarumaha daraasaadka ee aqoonta u leh, waa in la sameeyaa daraasad qoto dheer oo ku saabsan qashinka halista ah ee wadanka ku baahsan, bad iyo barriba (qashinkaas oo badankiisa si sharci daro ah badda loogu qubay, qayb na dhulka lagu aasay).

## 5.8. Dhaqanka, Hidaha iyo Goobaha Taariikhiga ah

Wadan kasta waxa uu ku faanaa dhaqankiisa iyo taariikhdiisa. Soomaaliya waxa ay leedahay goobo badan oo taariikh dheer leh iyo dhaqan soo jireen ah. Goobahaasi waxa ay ka tirsan yihiin deegaanka is la markaana waxa ay u baahan yihiin daryeel iyo ilaalin. Hadaba siyaasadda Dowladda ee ku aadan arrimahaasi waa:

1) In kor loo qaado aragtida dadweynaha ee ku aadan dhawrista dhaxalka dalka;
2) In aanu dalxiisku burburin goobaha loo dalxiis tago (haddii ay tahay goob taariikhi ah iyo keymaha iwm);
3) In si taxadar leh oo aan dhaawac iyo burbur gaadhsiinayn loo maamulo goobaha dhaxalka ah (heritage sites), farshaxanka (artefacts), taalooyinka (monuments) iwm;
4) In dadweynuhu aqoonsadaa in ilaalinta dhaxalka wadanku aanu ahayn masuuliyadda Dowladda oo qudha ee ay tahay masuuliyadda muwaadin kasta.
5) In lala shaqeeyo ururada maxaliga ah ee ku howlan ilaalinta dhaxalka dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

## 5.9. Teknoolojiyada Cagaaran (Nadiifka) iyo Hal-abuurnimada

Teknoolojiyadda cagaaran (clean technologies) waxaa loola jeedaa ka faa'idaysiga ilaha tamarta dib loo cusboonaysiin karo (renewable energy). Waa hal-abuur cusub oo yareeya qiiqa hawada lagu sii daayo. Sidaas darteed, saameynta deegaanku way yaranaysaa, kheyraadka dabiiciga ahna waxa looga faa'idaystaa si waara (joogtaysan). Wakhti xaadirkan, dunidu waxay u gudubtay dhanka teknolojiyada nadiifka/casriga ah sida gawaadhida ku shaqeysa korantada ,

tamarta qoraxda iyo dabaysha. Soomaaliya waxay leedahay qorrax iyo dabeyl badan, sidaa darteedna waxaa laga dhalin karaa tamar aad u badan. Sidoo kale, dalka Soomaaliya waxa uu leeyahay webiyo, gaar ahaan webiga Juba oo laga dhalin karo tamar aad u badan (hydropower).

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu:**

1) Waa in ay dhiirrigalisaa islamarkaana taageertaa kobcinta awooda dhammaan qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha wadanka (all sectors) iyo mashaariicda loogu gudbayo teknoolojiyadda nadiifta ah;
2) Waa in ay samaysaa nidaam wada shaqayneed oo ka dhexeeya xarumaha cilmi-baarista tikniyoolajiyadda maxalliga ah, hay'adaha cilmi-baarista ee shisheeye, kuwa dowliga ah iyo kuwa gaarka ah, kuwaas oo iska kaashanaya cilmi baarista iyo horumarka macluumaadka tikniyoolajiyadda nadiifka ah;
3) Waa in ay dhiirigeliyaa shirkadaha iyo warshadaha dalka sidii ay u isticmaali lahaayeen (teknoolojiyada) farsamooyinka nadiifta ah;
4) Lagu dadaalo sidii loo samayn lahaa hal abuur teknoolojiyadda cagaaran ah is la markaana la dhiiri galiyo fursada loogu gudbi karo dhaqaale cagaaran (transition to green economy).

## 5.10. Isbadelka Cimilada

Soomaaliya waa dal u nugul dhacdooyinka la xiriira cimilada sida abaaraha iyo daadadka, kuwaas oo khatar weyn ku ah horumarka dhaqan-dhaqaale ee dalka. Abaaraha soo noqnoqonaya waxay yareeyeen tirada xoolaha, waxayna sababeeen yaraanta ilaha biyaha; wax-soo-saarka beeraha iyo xoolaha. Saameynta ba’an ee isbeddelka cimilada ayaa sii xumaysay heerka xaalufinta deegaanka.

Isbedelka cimiladu waa mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee adduunka soo wajahaya qarnigan. Saynisyahannadu waxay isku raacsan yihiin in sannadaha soo socda uu isbedelka cimiladu keeni karo waxyeelo badan oo dad iyo duunyaba ah. Si loo yareeyo saameynta isbeddelka cimilada, waxaa loo baahan yahay in la qaado tallaabooyin adduunku uu u dhan yahay gaar ahaan waddamada horumaray (warshadaha leh) maadaama iyagu qiiqa ugu badan hawada ku sii daayaan (Green House Gas).

Awoodda ay hay’adaha dalka Soomaaliya ku maareyn karaan saameynta ka dhalata isbadelka cimilada waa mid aad iyo aad u xadidan. Dalku waxa uu u nugul yahay halista isbadelka

cimilada, markaa waxaa muhiim ah in la aqoonsado saameynta ay isbadaladaasi ku yeelan karaan yoolalka mustaqbalka fog ee waddanka. Ku tiirsanaanta xoolaha iyo beeraha roobka ku baxa ayaa ka dhigaya in ay Soomaaliya aad ugu nugulaato isbadelka cimilada. Sidaas darteed, Soomaaliya waxay ka mid tahay waddamada ugu nugul saameynta isbedelka cimilada. Wadanka waxaa soo food saaray dhacdooyin ba'an sida abaaro, daadad (fatahaad) iyo duufaano.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Waa in ay diyaarisaa oo ay hirgalisaa Siyaasada Qaran ee Isbedelka Cimilada (qabyo qoraalka siyaasadda ayaa hada la diyaariyay);
2) Waa in dhamaan qorshayaasha horumarineed iyo siyaasaddaha dalka ee heer kasta (Federaal, Dowlad Gobolleed, Gobol, Degmo, Tuullo) lagu daraa arrimaha la xidhiidha isbadelka cimilada iyo sidii wax looga qaban lahaa;
3) Waa in la abuuraa qaab dhismeedka hay'adeed ee Dowladda (Federaal iyo Dowlad Gobolleedyada) lana xoojiyaa hay’adahaas iyagoo laga taageerayo sidii loo gaadhi lahaa dhaqaale u adkaysan kara isbadelka cimilada;
4) Waa in la sameeyo istiraatiijiyadda wacyigalinta ku aadan isbadelka cimilada. Taasi waxa ay bulshada fursad u siin sidii ay ula qabsan lahaayeen isbadelka cimilada, loona yarayn lahaa samaynta ka dhalata. Arrimahaas waa in loo raacaa sida ay dhigayso Siyaasadda Qaran ee Isbadelka Cimilada;
5) Waa in la dhiso, maalgelin iyo xoojin lagu sameeyo xarumaha daaraasaadka (cilmi-baadhista) ee ka hawl gala arrimaha la xidhiidha isbadelka cimilada iyo deegaanka;
6) Waa in bulsho weynta laga qayb galiyaa, wacyi gelin iyo aqoon korodhsina la siiyaa si loo yareeyo ulana qabsadaan saameynta isbadelka cimilada;
7) La sameeyo istaraatajiyadda lagu maareynayo masiibooyinka dabiiciga ah.

## 5.11. Maareynta Masiibooyinka iyo u diyaargarowga Xaaladaha Deg-dega

Sanadba sanadka ka danbeeya waxa sii badanaya masiibooyinka (rabaani iyo kuwo ay dad sababaan) ka dhaca dalka. Masiibooyinka Soomaaliya soo food saara ayaa waxaa ka mid ah abaaro, daadad (fatahaad) iyo duufaano. Si wax looga qabto dhibaatooyinkaas, waddanku wuxuu u baahan yahay qorshe lagu maareynayo masiibooyinka iyo xaaladaha deg dega ah. Waa in la kobciyo awoodda dalka ee saadaalinta masiibooyinka dhici kara, ka hortagga masiibooyinka, yareynta saameyntooda iyo wax ka qabashadooda.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1. Kobciso awooddaha heer maamul gobolleed, gobol, degmo, iyo tuulo ee ku aaddan u diyaargarowga masiibooyinka.
2. Kor loo qaado isku xidhka hay'adaha kala duwan ee dowladda iyo kuwa aan dowliga ahayn, iyadoo si cad loo qeexayo hawlaha iyo waajibaadka hay'ad kasta.
3. Si loo diyaariyo barnaamijyo wax ku ool ah oo masiibooyinka wax lagaga qabanayo, dowladdu waa in ay samaysaa qiimayn lagu ogaanayo deegaanada iyo dadka halista ugu jira masiibooyinka,
4. Waa in la sameeyaa wacyi gelin ku saabsan halista masiibooyinka iyadoo dadka la siinayo macluumaad iyo waxbarasho (loo marinayo warbaahinta) oo ku saabsan masiibooyinka. Waa in dadka lagu dhiiri geliyaa sidii ay u qaadi lahaayeen tallaabooyin lagaga hortagayo masiibooyinka.
5. Si looga hortago masiibooyinka dabiiciga ah, waa in la sameeyo nidaamka digniinta hore (early warning). Si taasi loo gaadho waa in la aasaasaa xarumo aqooneed oo bixiya macluumaadka arrimaha masiibooyinka;
6. La kobciyo awoodda adkaysi ee bulshooyinka u nugul masiibooyinka sidii ay ula tacaali lahaayeen masiibooyinka is la markaana la adeegsadaa qaab dhismeedka jira (local community knowledge) ee bulshada sida xirfadaha iyo farsamooyinka laqabsashada.
7. Dowladdu ku dadaashaa sidii ay u bixin lahayd dhaqaalaha iyo kheyraadka ku baxaya ka hortaga iyo u diyaargarowga masiibooyinka

## 5.12. Jinsiga iyo Deegaanka (Gender and Environment)

Ragga iyo dumarku (labaduba) waxa ay door muhiim ah ka ciyaaraan ilaalinta deegaanka. Dhibaatooyinka deegaanku siyaabo kala duwan ayay u saameeyaan bulshada qaybaheeda kala duwan. Marka la eego kala duwanaashaha qaybaha bulshada ee dhanka aqoonta, waayo aragnimada, iyo awooda waxa ay door ka ciyaaraysaa maareynta deegaanka. Sidaas daraadeed, waxa muhiim ah in si siman looga faa'idaysto kheyraadka dabiiciga ah iyadoo tixgalin gaar ah la siinayo dumarka, dadka naafada ah, iyo bulshada la takooro.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Waa in arrimaha deegaanka lagu daraa qorshayaasha iyo siyaasaddaha dhaqaale ee wax lagaga qabanayo baahiyaha dadka nugul sida dumarka iyo naafada;
2) Waa in haweenku ka qayb galaan dhamaan qaybaha kala duwan ee maareynta deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah sida tababarada, wacyigelinta, waxbarashada (mid toos ah iyo mida dadban), iyo go'aan qaadasha la xidhiidha deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah;
3) Waa in haweenku qayb ka yihiin dhamaan siyaasadaha horumarineed ee la dejinayo;
4) Ragga iyo dumarku waa in ay ka wada qayb qaataan wacyigelinta deegaanka iyo barnaamijyada waxbarasho ee arrimaha bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka;

# Cutubka 6aad

# Hawlaha La xidhiidha Dhaqan gelinta Siyaasadda

## 6.1. Heerarka Deegaanka

Heerarka deegaanku waa qawaaniin tilmaamaya arrimaha deegaanka. Waa cabirraada tayada deegaanka ee goobaha kale duwan ("heerarka jawiga"), iyo sidoo kale xaddiga la oggol yahay ee wasakhda lagu sii dayn karo biyaha (qulqul) iyo hawada. Uumi-baxyada iyo heerarka deegaan ee heer kasta waxa lagu saleeyaa helitaanka guud ee tikniyoolajiyadda loo baahan yahay, suuragalnimada in lagu gaaro heerarka tayada deegaanka ee lagu dabaqi karo goobta ay quseyso heerarka qiiqa soo-jeedinta la soo jeediyay, iyo qiyaasta kharashka (cost) loo baahanyahay si loo gaadho heerarkaas.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay dejiso (diyaariso) xeerarka soo socda:**

- Heerarka Deegaanka ee Qaran ee Tayada Hawada
- Heerarka Deegaanka ee Qaran ee Ilaha Biyaha Cabitaanka
- Heerarka Deegaanka ee Qaran ee Xarumaha Isgaarsiinta (qalabyada: munaaradaha, anteenooyinka iwm)
- Heerarka Deegaanka ee Qaran ee Biyaha Badda
- Heerka Deegaanka ee Qaran ee Qiimaynta iyo Maareynta Sunta Cayayaanka ee Ciidda si loo Ilaaliyo Caafimaadka Aadanaha
- Heerarka Deegaanka ee Qaran ee Dhirta

## 6.2. Qiimaynta Saameynta Deegaanka

Qiimaynta Saameynta Deegaanku (Environmental Impact Assesment) waa baaritaan la sameeyo si loo ogaado waxyeellada deegaanka ka soo gaadhi karta barnaamij, waxqabad ama mashruuc lagu talo jiro in la fuliyo. Qiimaynta Saameynta Deegaanku waxa uu noqon doonaa habka ugu muhiimsan ee lagu qiimeeyo saameynta  mashaariicda cusub ee la rabo in la fuliyo.

Guud ahaan, marka la samaynayo Qiimaynta Saameynta Deegaanka (raad reebka uu mashruuc ku yeelan karo deegaanka) waa in laga jawaabaa su'aalahan soo socda:

1) Waa maxay saameynta ugu weyn ee mashruucu deegaanka soo gaadhsiin karo?
2) Wa'ayo cida (dadka) waxyeeladu (saamayntu) soo gaadhi karto, intee ayay leegtahay?

3) Tallaabooyinkee ayaa la qaadi karaa si qorshaha (naqshadda) mashruuca wax looga badelo islamarkaana saameynta (waxyeelada) mashruuca loo joojiyo ama loo yareeyo?

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Ku samayso qiimeynta saameynta deegaanka mashaariicda dowliga iyo kuwa gaarka ah ee waxyeello gaadhsiin kara deegaanka ka hor inta aan la siin oggolaanshaha ama ruqsada fulinta mashruuca
2) Ka hor inta aan ogolaansho la siin (bixin), waa in baadhis iyo saadaalin lagu sameeyo saameynta mashruuc horumarineed ku yeelan karo deegaanka;
3) Haddii loo baahdo, waa in wax laga badelaa habka dejinta (project design) ee mashruuca;
4) Si loo wada fahmo saameynta mashruuca la rabo in la fuliyo, waa in laga qayb galiyaa qof kasta oo ay khusayso sida: cida mashruuca iska leh (mulkiilayaasha), dadka aaga ku nool (deggan), shaqaalaha mashruuca fulin doona, hay'adaha Dowladda. Ujeedadu waxa weeye in la helo aqoon (macluumaad) buuxda oo ku saabsan saameynta deegaanka ee mashruuca islamarkaana go'aanka ugu dambeeya ee mashruucana la qaato iyadoo si buuxda loo fahansan yahay saameynta uu deegaanka ku yeelan karo.
5) Si looga hortago ama yareeyo waxyeelo caafimaad oo dadka soo gaadha, warbixinta Qiimeynta Saameynta Deegaanka waa in sidoo kale lagu qeexaa halista caafimaad ee suurtagalka ah ee ka dhalan karta mashruuca.

## 6.3. Wacyigelin, Waxbarasho iyo Macluumaad

Wacyigelinta deegaanku waa lama huraan si ay isku waafaqaan hab dhaqanka dadweynaha iyo baahida loo qabo in la ilaaliyo deegaanka. Haddii aan dadku ka warqabin baahida loo qabo in la ilaaliyo deegaanka, way adkaanaysaa in la fuliyo siyaasadda lagu maareynayo deegaanka. Waxa loo baahanyahay wacyigelin ku socota bulshada guud ahaan iyo sidoo kale qaybaha kale duwan ee bulshada sida dhalinyarada, dadka ku nool magaalooyinka, miyiga, shaqaalaha warshadaha iyo dhismaha, dowlada hoose iyo shaqaalaha kale ee dowlada. Wacyigelinta waxa ay ku saabsantahay sidii qofku uu u fahmi lahaa dhaqanka wanaagsan ee dhanka ilaalinta deegaanka iyo cawaaqibka xun ee ka dhalan kara ficilada aan wanaagsanayn ee ku aadan deegaanka sida caafimaadka bulshada, xaalada hab-nololeed iyo nadaafadda.

Si kor loogu qaado wacyiga dadweynaha ee ku aadan ilaalinta deegaanka waa in dadweynaha la siiyaa waxbarasho ku saabsan deegaanka. Waxbarashadaasi waxa ay noqon kartaa mid toos ah (formal) iyo mid dadban (informal) ama labada oo isku dhafan. Waxbarashadaas waxa bixin kara hay'adaha waxbarashada heerarkooda kala duwan, kuwa tooska ah iyo kuwa dadban.

Si loo qiimeeyo ku dhaqanka shuruucda, heshiisyada iyo heerarka deegaanka, waa in dhamaan daneeyayaasha deegaanku ay helaan macluumaadka deegaanka. Helitaanka macluumaadka deegaanka waxa uu daneeyayaasha ka caawinayaa in ay qaadaan tallaabooyinka loo baahan yahay iyo dhiiri galinta ku dhaqanka siyaasaddaha iyo shuruucda deegaanka. Sidoo kale, helintaanka macluumaadka deegaanku waxa uu dadweynaha ka caawinayaa in ay ka-qayb galaan xog-ogaalna u noqdaan arrimaha la xidhiidha deegaanka, geeddi-socodka wadatashiga, sida diyaarinta qiimeynta saameynta deegaanka, iyo qorshayaasha maareynta deegaanka ee mashaariicda horumarineed.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Sameyso oo hawl galiso nidaam khadka tooska ah (online) oo laga heli karo macluumaadka ku saabsan dhamaan arrimaha deegaanka;
2) Ku darto culuunta deegaanka manhajka waxbarashada tooska ah, ee dugsiyada hoose, dhexe, sare, jaamacadda, iyo heerarka xirfadeed, iyadoo xoogga la saarayo waxyaabaha ku habboon heer kasta;
3) Diyaariso isla markaana hirgeliso istiraatiijiyad kor loogu qaadayo wacyiga deegaanka ee guud ahaan dadweynaha iyo qaybaha bulshada iyada oo warbaahinta kala duwan lagu baahinayo macluumaadka la xidhiidha ilaalinta deegaanka;
4) Abaabusho wacyigelin dadweyne, tababaro, kulano iyo munaasabado lagaga doodayo arrimaha deegaanka;
5) Sameeyo meel lagu kaydiyo xogaha deegaanka (database) lana diiwaan galiyo qashinka halista ku ah deegaanka;
6) Ka taageerto bulshada sidii loo xallin lahaa isku dhacyada ku saleysan kheyraadka;
7) Dabaggal iyo diiwaangelin ku sameyso isbeddelka deegaanka; iyo
8) Bulshada ka qeyb galiso go'aanada la xiriira qorshayaasha horumarineed ee mustaqbalka iyo maareynta deegaanka.

## 6.4. Wada shaqeynta Daneeyayaasha Arrimaha Deegaanka

Ilaalinta deegaanku waxay ubaahantahay ka qeyb galidda daneeyayaal farabadan, kuwaas oo keeni kara awoodo, karti, iyo aragtiyo kale duwan. Iskaashiga iyo wada shaqaynta daneeyayaashu waxa ay ka natiijo badan tahay ficilada kalida ah. Hay'adaha Dowladda ee heer Federaal, Gobol, Degmo; fulinta, sharci dejinta iyo garsoorka; waaxaha dawliga iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay; hay'adaha dhaqaalaha; ururada warshadaha; xarumaha tacliinta iyo cilmi baarista; xirfadlayaasha madax-bannaan iyo khubarada; warbaahinta; naadiyada dhalinyarada; ururada maxaliga ah; ururada iskaa wax u qabso; iyo iskaashatada horumarka, waxaa laga yaabaa in mid kastaa ka ciyaaro door muhiim ah xagga iskaashiga ku saabsan sameynta, hirgelinta, iyo sare u qaadista tallaabooyinka ilaalinta deegaanka.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Dhiirrigelisaa iskaashiga Dowladda iyo bulshada, kaas oo hay'adaha dowliga ah iyo bulshada maxalliga ahi iska kaashadaan maareynta kheyraadka deegaanka, isagoo qayb (lammaane) kasta ay keenayso ra'yi la isku raacay, qaadanayso mas'uuliyado cayiman, iyo xuquuq u qeexan, tusaale ahaan in wada jir loo maareeyo dhirta.
2) Dhiirigelisaa korna u qaadaa waxqabadka bulshada tusaale; beerista geedaha, maareynta dhul daaqsimeedka, seerayaasha iyo helitaanka aagag la ilaaliyo;
3) Iskaashigu waa in uu ku salaysnaadaa mabaadi'da dowlad wanaagga, gaar ahaan hufnaanta, isla xisaabtanka iyo wax-ku-oolnimada.
4) Dhallinyaradu waa qaybta ugu firfircoon ee bulshada dalka. Si looga faa'idaysto awoodooda waa in laga qayb galiyaa dadaalada ilaalinta iyo daryeelka deegaanka.
5) Dhiirigaliso habkii hore ee Soomaalidu u ilaalin jirtay deegaanka.

## 6.5. Kobcinta Awoodda iyo Aqoonta

Arrimaha deegaanku horumar joogto ah ayay samaynayaan oo kolba wax cusub ayaa ku soo kordhaya. Sidaas darteed, waxaa muhiim ah in si joogto ah loo kobciyo awoodda hay'adaha ka shaqeeya arrimaha deegaanka: hay'adaha dawliga ah, kuwa aan dawliga ahayn, hay'adaha cilmi baadhista iyo waxbarashada, ururada maxalliga ah iyo warbaahinta.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Samayso nidaam lagula soconayo (lagu ogaan karo) halisaha/khataraha ku soo wajahan dadka iyo deegaanka;
2) Bixiso tababaro lagu horumarinayo awoodaha qaran ee ilaalinta deegaanka.
3) Iyadoo la tashanaysa (ka qayb galinaysa) bulshada ay qusayso, diyaarisaa qorsheyaal lagu maareynayo seerayaasha iyo in hab waara looga faa'idaysto;
4) Iyadoo la tixgalinayo muhiimadda badda iyo xeebaha Soomaaliya, Dowladdu waa in ay dhistaa awooda qaran ee lagula tacaali karo haddii uu shidaal wasakhayo ama ku daato badda ama xeebaha;
5) Dib-u-eegid ku sameeysaa awoodaha haatan jira ee heer Federaalka iyo Dowlad Gobolleedyada, iyadoo la eegayo hirgelinta shuruucda iyo xeerarka deegaanka;
6) Si joogta ah kor ugu qaadaa aqoonta saynis iyo xirfadaha farsamo ee dhamaan shaqaalaha ku hawlan maareynta deegaanka ee heer kasta: Federaal, Gobol, Degmo iyo Tuulo.

## 6.6. Iskaashiga Caalamiga ah

Muddadii ka horreysay 1991 Soomaaliya waxay ka qeyb ka ahayd dhowr heshiis oo caalami ah oo ku saabsan ilaalinta deegaanka. Waxaa intaa dheer, sannadihii u danbeeyay Soomaaliya waxay saxiixday heshiisyo badan oo la xiriira deegaanka. Iyadoo la aqoonsan yahay in mushkiladaha deegaanku ay xuduudaha iskaga gudbaan, dalku wuxuu saxeexay ama ansaxiyay heshiisyo muhiim ah oo dhinacyo badan taabanaya oo ku saabsan arrimaha deegaanka. Liistada soo socota waa heshiisyada ay Soomaaliya saxiixday ama ay ansixisay:

1. Heshiiska Caalamiga ah ee mamnuucaya ka ganacsiga noocyada noolaha dhirta iyo duurjoogta dabargoa ku dhaw (halis ku sugan in ay dabar go'aan) (CITES);
2. Heeshiiska ilaalinta xayawaanka (duurjoogta) xuduudaha iskaga goosha;
3. Heshiis Goboleedka Ilaalinta Badda Cas iyo Deegaanka Gacanka Cadmeed;
4. Heshiis Goboleedka iyo Iskaashiga lagula tacaalayo ama looga hortagayo wasakhaynta ay sababaan shidaalka (batroolka) iyo walxaha halista ah;
5. Heshiiska Qaramada Midoobay Sharciga Badda;
6. Heshiiska Qaramada Midoobay ee lagula dagaallamayo nabaad-guurka (Xaalufka) (UNCCD);
7. Heshiiska Qaramada Midoobay ee Isbedelka Cimilada (UNFCCC);
8. Heshiiska Kyota;
9. Heshiiska Noolaha kala duwan;

10. Heshiiska sugnaanta (ilaalinta) noolaha (Protocol on Bio-Security) (Protocol-ka Cartagena);
11. Heshiisyada Basel, Stockholm iyo Rotterdam;
12. Heshiiska Bariga Afrika Seerayaasha, ilaalinta dhirta (flora) iyo xayawaanka (fauna);
13. Heshiiska Bariga Afrika ee ka hortagga wasakhda badda ee xaaladaha degdegga ah;
14. Heshiiska Ilaalinta, Maareynta iyo Horumarinta Deegaanka Badda iyo Xeebaha Bariga Afrika (Heshiiska Nairobi).
15. Heshiiska ku saabsan Waxyaabaha daciifiya lakabka Ozone ka (Montreal Protocol)
16. Heshiiska ku saabsan ilaalinta lakabka Ozone ka (Heshiiska Vienna);

**Bayaanadda Siyaasaddeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Ka faa'iidaysato barnaamijyada iskaashi ee caalimiga ah (multilateral) iyo laba geesood ah ee loogu talo galay kobcinta awoodda maareynta deegaanka;
2) Ka qeybqaadato farsamooyinka iyo qabanqaabooyinka (heshiisyada) caalamiga ah ee kor loogu qaadayo sidii hab waara looga faa'idaysan lahaa khayraadka;
3) Kala shaqeyso waddamada gobolka arrimaha ku saabsan ilaalinta deegaanka iyo in si siman looga faa'idaysto webiyada iyadoo la raacayo qaanuunka caalamiga ah;
4) Dhaqan galiso heeshiisyada caalamiga ah iyadoo heshiisyadaas laga dhigayo qayb ka mid ah shuruucda wadanka;

## 6.7. Dhaqangelinta Siyaasadda

Siyaasad waxa ay macno leedahay haddii la fulinayo. Siyaasadda Deegaanka ee Qaranka waxa ay qeexaysaa (tilmaamaysaa) tallaabooyinka kor loogu qaadayo daryeelka deegaanka. Si loo hirgeliyo siyaasaddan, dhammaan heerarka kale duwan ee dowladda (Federaal, Gobol, Degmo iyo Tuulo) waxa ay door muhiim ah ka ciyaarayaan dhaqan gelinta siyaasadda.

**Bayaanadda Siyaasaddeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1. La diyaariyaa (la dejiyaa/ la dhamaystiraa) shuruucda maareynta deegaanka ee heer Federaal iyo Dowlad Gobolleed;
2. Dib u eegis lagu sameeyaa shuruucda deegaanka ee haatan jira;

3. Shuruucda deegaanka ee loo baahan yahay in la diyaariyo waxaa ka mid ah:
    - Xeerka Maareynta Deegaanka ee Qaranka
    - Xeerka Dhirta/Keymaha iyo Duurjoogta
    - Xeerka Maareynta Dhulka
    - Xeerka Macdanta
    - Xeerka Ilaalinta Badda
    - Xeerka Maareynta Qashinka (adag & dureeraha)
    - Xeerka Maareynta Biyaha

## 6.8. Dhaqaalaha ku baxaya Ilaalinta Deegaanka

Nidaamka dhaqaalaha ku baxaya ilaalinta deegaanku waxa uu qayb ka yahay nidaamka maaliyadeed (kharashaadka) ee Dowladda. Dhaqaalaha ilaalinta deegaanku waxa uu qeexayaa aaladaha dhaqaale, mabaadi'da iyo qawaaniinta lagu xukumayo dariiqooyinka iyo qaababka loo soo uruurinayo loona qaybinayo ilaha dhaqaalaha si loogu maalgeliyo mashaariicda lagu ilaalinayo deegaanka. Maalgelintaasi waxa ay lama huraan u tahay si loo gaadho himilooyinka ilaalinta deegaanka iyo horumarinta. Soomaaliya waa dal aan dhaqaale badan haysan. Caqabadaha dhaqaale ee wadanka ka jira awgeed, miisaaniyadda Dowladda waxa ay ahmiyadda koowaad siinaysaa barnaamijyada (mashaariicda) lagu ciribtirayo saboolnimada. Sidaas darteed, waxa dhici karta in maalgelinta hawlaha lagu ilaalinayo deegaanka aan dhaqaale loo qoondayn ama aan loo helin.

Si kastaba ha ahaatee, casriyeynta dhaqaalaha Soomaaliya waa inay garab socotaa maalgelin waxtar u leh ilaalinta deegaanka. Horumar waara, kor u qaadid tayada nolosha iyo caafimaadka dadka Soomaaliyeed waxaa la gaari karaa oo keliya haddii uu jiro nidaam lagu maalgeliyo ilaalinta deegaanka iyo maareynta kheyraadka dabiiciga ah kaas oo laga helayo ilaha dhaqaale ee qaranka iyo kuwa caalamiga ah.

Nidaamka ilaha dhaqaale ee hawlaha lagu ilaalinayo deegaanka Soomaaliyeed waxa laga heli:

1. Miisaaniyadda Dowladda

Sida uu qeexayo Dastuurka dalku, Dowladda (Federaal iyo Dowlad Gobolleed) ayaa masuul ka ah ilaalinta deegaanka.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

- Dowladdu waa in ay miisaaniyad u qoondaysaa mashaariicda lagu ilaalinayo deegaanka.

Laakiin miisaaniyadda Dowladda oo kaliya kuma filna si loo gaadho ujeedooyinka ilaalinta deegaanka. Waa in ilo kale oo dhaqaale la helaa.

2. Lacagaha Ganaaxa iyo Dakhliga kale ee Deegaanka

Iyadoo la raacayo mabda'a "Bi'iye ayaa Bixinaya" (Pollutor pay principle), hay'adaha Dowladdu ee awooda u leh waxa ay soo ururinayaan ganaaxyo iyo dakhli kale oo deegaanka ku saabsan. Ganaaxyadaas iyo dakhligaas waxaa ka mid ah u hogaansanaan la'aanta shuruucda deegaanka, khidmadaha liisamada/ruqsadaha, ururinta qashinka, farsamaynta qashinka iyo biyaha wasakhaysan iyo dakhliyo kale.

- Dhaqaalahaas la soo ururiyay waa in loo isticmaalaa mashaariicda lagu ilaalinayo deegaanka oo ay ka mid yihiin: hirgelinta goobo lagu farsameeyo qashinka iyo biyaha wasakhda ah, samaynta bullaacadaha, maareynta qashinka, kor u qaadida tayada biyaha la cabo, tayada hawada, ilaalinta ciidda, noolaha kale duwan iyo ilaalinta dhulka.

3. Taageerada Caalamiga ah (Dhaqaalaha Dibadda laga helo)

Hay'adaha maaliyadda ee adduunka sida Bangiga Adduunka waxa ay dhaqaale u qoondeeyaan mashaariicda lagu ilaalinayo deegaanka.

- Raadisaa ama baadigoobtaa sidii loo heli lahaa taageero dhaqaale iyo deyn shisheeye si loo ilaaliyo oo loo daryeelo deegaanka Soomaaliyeed

4. Ilaha Dhaqaale ee kale waxaa ka mid ah: Ururada taageera ilaalinta deegaanka iyo tabarucaadda shirkadaha gaarka ah iyo iwm.

## 6.9. Dib-u-eegista Siyaasadda Dabagalka iyo Qiimeynta

Adduunka maanta aynu ku noolnahay waa mid si xawli ah isu beddeleya. Arrimaha deegaanka ee hada muuqda ayaa laga yaabaa inay isbedelaan waqti kadib, kuwa cusubna booskooda ayey qaadan karaan. Fahanka sayniska ee arrimaha deegaanka ayaa ah mid si xawli ah u horumaraya.

Si haddaba loola jaanqaado si beddeladaas, waxa lagama maarmaan ah in dabagal, qiimeyn iyo dib u eegis lagu sameeyo Siyaasadda Maareynta Deegaanka ee heer Qaran lana cusbooneysiin karo haddii loo baahdo.

**Bayaanada Siyaasadeed**

**Dowladdu waa in ay:**

1) Haddii loo baahdo wax ka badal iyo kaabis ku samayso Siyaasadda Maareynta Deegaanka isla markaana afartii sano hal mar la yeelataa wada tashi daneeyayaasha kala duwan sida; cilmi baarayaasha, khuburada arrimaha deegaanka, ururada bulshada rayidka ah ee ku hawlan arrimaha deegaanka, ururada ganacsatada, iyo ururada iskaa wax u qabso.
2) Sanadka afraad sameysaa baaris dhameystiran oo ku saabsan fahamka sayniska ee arrimaha deegaanka, haddii loo baahdana dib loo qeexaa ujeeddooyinka iyo mabaadi'da siyaasadda deegaanka. Ujeedadu waxa weeye in Siyaasadda Maareynta Deegaanku ay la jaanqaado fahanka cusub ee sayniska ee arrimaha deegaanka.

# Cutubka 7aad

# Qaab-dhismeedka Hay'adaha Dowladda

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa saldhig u ah dasuurka dalka. Dastuurku waxa uu dhigayaa in qaab-dhismeedka Dowladda Soomaaliya ay tahay laba heer: Dowladda dhexe (Federaal) iyo Dowlad Gobolleedyo. Dowladda dhexe iyo Dowlad goboleedyadu door muhiim ah ayay ku leeyihiin ilaalinta deegaanka. Mid kasta waxa ay leedahay door ku habboon. Dastuurku waxa uu dhigayaa "*Awood walba waa in la siiyo hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta*" (Qodobka 50aad faqradiisa B).

Haddii awoodaha loo qaybiyo (Dowladda dhexe iyo Dowlad gobolleedyada) si habboon, ilaalinta deegaanka iyo barnaamijyada deegaanku waxay noqonayaan kuwo guuleysta oo kharashkooduna uu macquul yahay. Xukuumadda federaalku waa in ay xoogga saartaa hawlaha deegaanka ee ay dowladda federaalku si fiican wax uga qaban karto marka la barbar dhigo Dowlad goboleedyada. Tusaale ahaan, dowladda federaalku waa inay hoggaamiso wax ka qabashada waxyaabaha (wasakhowga) iskaga gudbaya xuduudaha dowladaha xubnaha ka ah Federaalka. Wax ka qabashada wasakhowga xuduudaha ka gudbaya waa in loo dhaafaa dowladda dhexe maadaama iyadu ay dhexdhexaad ka tahay. Dhanka kale, arrimaha deegaanka ee maxalliga ah waa in loo daayaa dowladaha xubinta ka ah Federaalka. Waa lama huraan in la garto baahida loo qabo is-kaashi iyo wada shaqayn ka dhexeysa heerarka kala duwan ee dowladda.

Sidoo kale, waxaa muhiim in la sameeyo hay'ad dowladeed oo madax banaan taas oo u qaabilsan la socodka arrimaha deegaanka iyo soo saarista macluumaad madax-banaan.

## 7.1. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada

Marka la eego heer Federaal, Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa masuul ah dejinta siyaasaddaha, qorsheyaasha, la socodka iyo dhaqan gelinta arrimaha la xiriira deegaanka. Wasaaraddu waa isha guud ee hagaysa siyaasadda iyo aragtida istiraatiijiyadeed ee deegaanka, taas oo noqonaysa gundhiga siyaasadaha deegaanka iyo shuruucda dalka.

Dowladaha xubinaha ka ah dowladda federaalku waxay lahaan doonaan wasaarado u gaar ah oo mas'uul ka ah maareynta deegaanka iyo isbaddelka cimilada ee goboladooda. Siyaasadaha iyo shuruucda ay dejiyaan waa in la waafajiyaa siyaasadaha iyo shuruucda dalka (heer federaal).

## 7.2. Wasaaradaha Waaxyaha

Maareynta deegaanku waa howl ballaaran oo taabanaysa dhinacyo badan. In guul laga gaaro waxay ku xirantahay wadashaqeynta hay'adaha/wasaaradaha dowlada ee mas'uulka ka ah qeybaha kala duwan ee deegaanka. Maareyn deegaan  oo wax ku oolka ah si loo gaaro waxaa loo baahan yahay in wasaaradaha kale duwan ee dowladdu ay ka qayb noqdaan ilaalinta deegaanka. Wasaaraddaha waaxyuhu waxa ay leeyihiin waaxyo u qaabilsan ilaalinta deegaanka. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu waa hay'adda masuulka ka ah awoodda kormeerka iyo isku xirka dhammaan arrimaha la xiriira deegaanka iyo isbaddelka cimilada.

Wasaaradaha waaxyaha bahwadaagta la ah deegaanka waxaa ka mid ah:

1. Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha
2. Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka
3. Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga
4. Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa
5. Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta
6. Wasaaradda Hawlaha Guud
7. Wasaaradda Dakadaha iyo Gaadiidka Badda
8. Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada
9. Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta
10. Wasaaradda Caafimaadka
11. Wasaaradda Waxbarashada
12. Hay’ada Maaraynta Masiibooyinka